

COVID-19 IYO HORUMARKA WAARA EE SOOMAALIYA / SOMALILAND

NOLOSHA, QAAB NOLOOLEED IYO KA MID AHAANSHIYAH

Eric Herring, Peter Campbell, Mustafe Cilmi, Ladiif Ismaaciil, Jamaal Jaamac, Sandra McNeill, Cabdirubuc, Asma Siciid, Amal Siciid, Muna Yuusuf

Jaamacadda Bristol iyo Transparency Solutions

Luulyo 2020



COVIDEV

COVIDEV waa howl cilmi baaris oo ay jaamcadda Bristol iyo Transparency Solutions ka sameeyeen ilaalinta iyo kobcinta horumarka waara ee Soomaaliya / Somaliland intii lagu guda jiray COVID-19, iyada oo ah hab lagaga jawaab celinayo COVID-19.

Hawshan, horumarka waara waa xoojinta nolosha, maciishada iyo is dhixgelinta jiilka hadda iyo ka soo socda si nolosha ay u qalmaan ay ugu noolaadaan, hab suurtagelinaya in dunida dabiiciga ahi ay u sii barwaaqawdo.

COVIDEV waxa uu qayb ka yahay hindisaha 'Soomaalida mudnaanta leh' ee ay iska kaashadeen jaamacadda Bristol iyo Transparency Solutions ee lagu kobcinayo horumar dhinacyada oo dhan ah oo ay Soomaalida qudheedu hoggaaminayso. Transparency Solutions waxa ay istriraatijiyad wada shaqayneed la leedahy jaamacadda Bristol.

Hawshan waxaa gacan ka geysatay sanduuqa cilmibaadhista caqabadaha dunida ee jaamacada Bristol.

Waa mahadsan yahay Kamaal Marjaan oo warbixinta oo kooban af Soomaali ku tarjumay.

Waa mahadsan yahay Jamaal Jaamac oo warbixinta naqshadeeyey.

Bare-sare Eric Herring

School of Sociology, Politics
and International Studies
University of Bristol
eric.herring@bristol.ac.uk
www.bristol.ac.uk/spais

Latif Ismail

Agaasimaha Fulinta, Transparency Solutions
Soomaaliya, Somaliland, Puntland, Kenya
latif.ismail@transparencysolutions.com
www.transparencysolutions.com

TUSMO

Tusayaasha	2
Hordhac	3
Xogta ka qaybgalayaasha.	6
Walaacyada jira	15
Saamaynta uu ku leeyahay dadka kale iyo ururrada	16
Suurtagalmimada caabuqa COVID-19	17
Xog la xidhiidha sida looga hortegi karo caabuqa:	
Raadka uu ku yeesho shucuurta qofka.	18
Tallaabooyinka loo qaaday nolosha, maciishada iyo ka wada qaybgalka.	19
Qeexda tallaaboooyinka xaddidan ee ay dhinacyada kale qaadeen si looga hortago caabuqa	21
Dareen celinta natijjooyinka hordhaca ah	22
Dib u eegista gacan ka hadalkii laga cabsi qabay	23
Ceebaysiga bukaanka iyo cabsida coronavirus	24
Ka dhega-adaygista tegista cisbitaalka iyada oo ay jiraan calaamadiihii covid-19	25
Qiiimaynta	26
Gorfeyn	26
Gunaanad	33

TUSAYAASHA


- Tusaha 1** Saambalka Muqdisho
- Tusaha 2** Saambalka Hargaysa
- Tusaha 3** Walaaca ugu weyn ee laga qabo saddexda bilood ee soo socda – Muqdisho
- Tusaha 4** Walaaca ugu weyn ee laga qabo saddexda bilood ee soo socda – Hargeysa
- Tusaha 5** Saamaynta uu ku leeyahay dadka kale iyo ururrada – Muqdisho
- Tusaha 6** Saamaynta uu ku leeyahay dadka kale iyo ururrada – Hargeysa
- Tusaha 7** Suurtagalmimada caabuqa COVID-19 – Muqdisho
- Tusaha 8** Suurtagalmimada caabuqa COVID-19 – Muqdisho
- Tusaha 9** Xog la xidhiidha sida looga hortegi karo caabuqa: Raadka uu ku yeesho
Shucuurta qofka – Muqdisho
- Tusaha 10** Xog la xidhiidha sida looga hortegi karo caabuqa: Raadka uu ku yeesho
Shucuurta qofka – Hargeysa
- Tusaha 11** Tallaabooyinka loo qaaday dhinaca nolosha – Muqdisho iyo Hargeysa
- Tusaha 12** Tallaabooyinka loo qaaday dhinaca Maciishada – Muqdisho iyo Hargeysa
- Tusaha 13** Tallaabooyinka loo qaaday dhinaca ka wada qaybgalka – Muqdisho iyo Hargeysa
- Tusaha 14** Tallaabooyinka kale ee la qaaday – Muqdisho iyo Hargeysa
- Tusaha 15** Qeexda Tallaabooyinka Xaddidan ee ay Dhinacyada Kale Qaadeen si looga
Hortago Caabuqa – Muqdisho
- Tusaha 16** Qeexda Tallaabooyinka Xaddidan ee ay Dhinacyada Kale Qaadeen Si looga
Hortago Caabuqa – Hargeysa
- Tusaha 17** Dareen-celinta ka qaygalayaasha ee natijjooyinka hordhaca ah – Muqdisho
- Tusaha 18** Dareen-celinta ka qaygalayaasha ee natijjooyinka hordhaca ah – Hargeysa
- Tusaha 19** Cabsida laga qabo gacan ka hadalka – Muqdisho
- Tusaha 20** Cabsida laga qabo gacan ka hadalka – Hargeysa
- Tusaha 21** COVID-19 iyo xishoodka – Muqdisho
- Tusaha 22** COVID-19 iyo xishoodka – Hargeysa
- Tusaha 23** COVID-19 iyo Qarsiga xanuunka – Muqdisho
- Tusaha 24** COVID-19 iyo Qarsiga xanuunka – Hargeysa
- Tusaha 25** Maskaarada iyo colaadaysiga – Muqdisho
- Tusaha 26** Maskaarada iyo colaadaysiga – Hargeysa
- Tusaha 27** Ka dhego-adaygista tegista cisbitaalka iyada oo ay jiraan calaamadihi
COVID-19 – Muqdisho
- Tusaha 28** Ka dhego-adaygista tegista cisbitaalka iyada oo ay jiraan calaamadihi
COVID-19 – Hargeysa
- Tusaha 29** Qiimaynta mashruuca – Muqdisho
- Tusaha 30** Qiimaynta mashruuca – Hargeysa

TUSAHA KOWAAD

Soomaaliya/Somaliland waxa ay ka mid yihiin meelaha adduunka ugu taagta daran, la tacaalista COVID-19 (Xanuunka Coronavirus), iyada oo ay horeba u jireen wejiyo badan oo ah fara madhnaan ka dhalatay saboolnimada, helitaanka daryeelka caafimaad oo aad u hoo-seeya iyo awoodda dawladnimo oo xaddidan. Mashruucan waxa aynu ku eegaynaa sida horumarka waara loo xoojin karo inta lagu jiro iyo si looga jawaabo COVID-19 ka Soomaaliya / Somaliland.

Horumar waara: horumarinta nolosha, nolol-maalmeedka iyo ka mid noqosha-da jiilka hadda jira iyo kan mustaqbalka-ba si ay ugu noolaadaan nolol qjimo leh oo oggolaanaysa adduunka dabiiciga ahina inuu sii jiro.

Waxa aanu inta badan samaynay dodo aanu la yeelanay dadka Muqdisho (Caasimadda Soomaaliya) iyo Hargeysa (Caasimadda Somaliland). Dadka aanu la hadalnayna waxa ay inta badan ahaayeen kuwa si uun looga faquuqay in ay si buuxda bulshadooda uga mid noqdaan, iyada oo lagu takoorayo wax-barasho la'aan, jinsigooda, da' yaraan, qabiilka ay ka dhasheen oo laga tiro badanyahay, shaqaale hoosaad ay yihiin awgeed, reer baadiye xoola dhaqato ah in ay yihiin darteed, in ay ganacsato yaryar oo aan rasmi ahayn yihiin, iyo in ay yihiin barakacayaal ama qax-



oonti dal kale ka yimi. Waxa kale oo aanu arimahan falanqayn kala yeelanay dad bulshada dhexdeeda martabad muhiim ah ka jooga. Waxa aanu samaynay waraysiyo taxane ah iyo dodo wadareed ay bilihi Meey iyo Juun 2020 ka yeesheen ka qaybgalayaal afartan tiradoodu tahay. Waxaa la hubiyey Badqabka iyo caafimaadka la xidhiidha COVID-19 ee dhammaan cilmibaadhayaasha iyo ka qaybgaleyaasha iyada oo kulamda loo galay hab aan fool-ka-fool ahayn, sida taleefan ama internet. Waxa aanu hawlgelinnay Afartan ka qaybgale oo ugu yaraan ay isku mid tahay tirada dhedigga iyo labku, labaatan ka mid ahi waxa ay ka socdeen Muqdisho, labaatanka kalana Hargeysa.

Tusaha 1: Saambalka Muqdisho

Ka qay-bgalaha	Dabaqadda Saambalka	Dhadig / Lab	Qiyaasta da'da	Sannadaha waxbarashada Rasmiga ah	Heerka Dakhliga	Shaqada	Afafka uu uku hadlo (Afka koowaad horreysii)	Nooca telefoon-ka gacanta
P1	Masuul Dawladeed oo Caafimaadka ah	Dhadig	24-39	11 ama ka badan	Dhexe	Sarkaal caafimaad oo dawlaadka ka tirsan (sare)	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P2	Masuul Dawladeed oo shaqaalaysiinta ah	Lab	24-39	11 ama ka badan	Sare	Sarkaal shaqaa-laysiinta ah oo dawlaadka ka tirsan (sare)	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P3	Masuul daw-ladeed oo U dhammaanshiyaha qaabilسان	Dhadig	24-39	11 ama ka badan	Dhexe	Masuul dawladeed oo u dhammaan-shiyaha qaabilسان (sare)	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P4	Shaqaalaha Isgaadhsiinta	Lab	24-39	11 ama ka badan	Dhexe	Shaqaalaha Isgaadhsiinta (sare)	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P5	Ganacsiga yaryar ee aan rasmiga ahayn	Dhadig	40-59	0	Aad u hooseeya	Ganaci yar oo aan rasmi ahan (caano)	Maay / Soomaali	Asaasi
P6	Ganacsiga yaryar ee aan rasmiga ahayn	Lab	60 or older	0	Hoose	Ganaci yar oo aan rasmi ahan (guud)	Maay / Soomaali	Asaasi
P7	Haween	Dhadig	24-39	6-10	Hoose	Dukaanle	Maay	Casri
P8	Haween	Dhadig	24-39	11 ama ka badan	Dhexe	Maamule maali-yadeed / Agaasime	Maay / Soomaali	Casri
P9	Dhalinyaro	Lab	18-23	11 ama ka badan	Dhexe	Qoraa / Turjume	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P10	Dhalinyaro	Dhadig	18-23	11 ama ka badan	Dhexe	Xoghaye / U heellane danaha dhalinyarada	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P11	Aan akhris-qoraal-ka aqoon	Lab	24-39	0	Aad u hooseeya	Baabuurta dhaqa / Shaqooyin dakhli hoose	Maay / Soomaali	Asaasi
P12	Aan akhris-qoraal-ka aqoon	Dhadig	24-39	0	Aad u hooseeya	Shaqale guri	Soomaali	Asaasi
P13	Barakace (Miyiga Shabeelaha Hoose)	Dhadig	24-29	0	Aad u hooseeya	Shaqo la'aan	Maay / Soomaali	Asaasi
P14	Barakace (Goofguduud, Baay)	Lab	40-59	1-5	Hoose	Dareewal	Maay / Soomaali	Asaasi
P15	Qabiillada laga tiro badan yahay (Ajuuraan)	Dhadig	60 or older	0	Aad u hooseeya	Shaqale guri	Soomaali	Asaasi
P16	Qabiillada laga tiro badan yahay (Jaars)	Dhadig	40-59	1-5	Aad u hooseeya	Kaaliye cunto karinta ah	Maay / Soomaali	Asaasi
P17	Shaqale hoosaad (Gabooye)	Lab	24-39	0	Hoose	Birta iyo alxanka (wildhanka)	Soomaali	Asaasi
P18	Isir laga tiro badan yahay (Soomaali-Yemeni)	Dhadig	18-23	1-5	Hoose	Cunto-kariye xirfadle ah	Carabi / Soomaali	Casri
P19	Reer miyi xool-adhaqato ah	Lab	60 or older	0	Hoose	Xoolodhaqato	Somali	Asaasi
P20	Naafio (Gaadhi Curyaan Iisticmaala)	Lab	24-39	11 ama ka badan	Dhexe	U heellane danaha dadka naafada ah	Soomaali / Ingiriisi	Casri

Tusaha 2: Saambalka Hargeysa

Ka qayb-galaha	Dabaqadda Saambalka	Dhadig / Lab	Age range	Sannadaha waxbar-ashada Rasmiga ah	Heerka Dakhliga	Shaqada	Afafka uu uu ku hadlo (Afka koowaad horreysii)	Nooca telefoon-ka gacanta
P21	Masuul Dawladeed oo Caafimaadka ah	Dhadig	24-39	6-10	Dhexe	Masuul Dawladeed oo Caafimaadka ah (dhexe)	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P22	Masuul Dawladeed oo shaqaalaysiinta ah	Lab	40-59	11 ama ka badan	Dhexe	Masuul Dawladeed oo shaqaalaysiinta ah (dhexe) – Warsigaadhsiiinta	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P23	Masuul dawladeed oo U dhammaanshiyahaa qaabilsan	Dhadig	18-23	11 ama ka badan	Dhexe	Masuul dawladeed u dhammaanshiyahaa (Hoose)	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P24	Shaqaalaha Isgaadhsiiinta	Lab	40-59	11 ama ka badan	Dhexe	Shaqaale isgaadhsineed (sare)	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P25	Ganacsiga yaryar ee aan rasmiga ahayn	Lab	24-39	11 ama ka badan	Dhexe	Ganacsi yar oo aan rasmi ahan (cabitaanka)	Soomaali / Ingiriisi	Asaasi
P26	Ganacsiga yaryar ee aan rasmiga ahayn	Dhadig	18-23	11 ama ka badan	Dhexe	Ganacsi yar oo aan rasmi ahan (qudaarta)	Soomaali	Casri
P27	Haween	Dhadig	40-59	11 ama ka badan	Dhexe	Ganacsi yar oo aan rasmi ahan (guud)	Soomaali / Ingiriisi Yar	Casri
P28	Haween	Dhadig	24-39	11 ama ka badan	Dhexe	Cilmi-Baadhe	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P29	Dhalinyaro	Dhadig	18-23	6-10	Dhexe	Qurxinta timaha (koofeef)	Soomaali	Casri
P30	Dhalinyaro	Lab	18-23	11 ama ka badan	Dhexe	Arday Caafimaad / Aan Shaqayn	Soomaali / Ingiriisi	Casri
P31	Aan akhris-qoraalka aqoon	Dhadig	18-23	1-5	Hoose	Mulkiile maqaaxi	Soomaali	Casri
P32	Aan akhris-qoraalka aqoon	Lab	40-59	0	Aad u hooseeyya	Ibiye qalabka fujiska ah ee gaadiidka	Soomaali	Asaasi
P33	Barakace (Soomaali-Itoobiyaan Ah)	Dhadig	24-39	11 ama ka badan	Aad u hooseeyya	Mulkiile meherad shaah	Soomaali	Casri
P34	Barakace (Baadiyaha Gebiley)	Lab	40-59	11 ama ka badan	Hoose	Maamule Dugsi Hoose oo dawlaadeed	Soomaali / Carabi Yar / Broken English	Asaasi
P35	Qabil laga tiro badan yahay (Madigaan – Dir)	Lab	40-59	11 ama ka badan	Hoose	Maamule Dugsi Hoose oo Dawladeed	Somali / Arabic / Ingiriisi Jajab ah	Asaasi
P36	Qabil laga tiro badan yahay (Jaarso)	Dhadig	40-59	6-10	Dhexe	Dukaanle	Soomaali	Asaasi
P37	Shaqaaale Hoosaad (Gabooye)	Lab		6-10	Aad u hooseeyya	Timo-jare	Soomaali	Asaasi
P38	Isir Laga Tiro badan yahay (Yemeni)	Dhadig	40-59	11 ama ka badan	Aad u hooseeyya	Guri-joog	Carabi	Casri
P39	Reer Miyi xooladh-aqato ah	Lab	40-59	0	Aad u hooseeyya	Beeraley/ Xooladhaqato ah	Somali	Asaasi
P40	Naafu (Cudurka Dabaysha)	Lab	40-59	11 ama ka badan	Aad u hooseeyya	Macallin Qur'aan	Somali / Arabic	Asaasi

XOGTA KA QAYBGALAYAASHA

Mogadishu



"Waxa aan shahaada-da koowaad ee jaamacadda (Baajolaar) oo dhakhtarnimo iyo qalliinka ah ka qatay Jaamacadda Banaadir, waxa na aan shahaadada labaad (Mastar) oo ka kabashada masiibooyinka, hoggaaminta iyo hawlaha samafalka ah aan ka diyaariyey

Jaamacadda Peace, iminka waxa aan shahaadada labaad oo caafimaadka haweenka uurka leh iyo cudurrada haweenka (OB-GYN) aan ka diyaariyaa Jaamacadda Banaadir. Waxa aan ahay hawladeen caafimaad oo ka tirsan wasaaradda Caafimaadka iyo Isbitalaka Martiini oo aan ka mid ahay kooxda la tacaalidda bukaannada COVID-19, sida oo kale waxa aan xaaladaha degdeffa ah kala shaqeeyaa Isbitaal Madiina." (P1: Hodan Axmed "Ugaaso". Masuul sare oo caafimaad oo ka tirsan dawladda, Muqdisho)

"Waxa aan ahay Injineer sare oo ka tirsan shirkadaha Isgaadhsiinta ee Hormuud iyo Vivacom. Waxa aan masuul ka ahay rakibidda iyo dayactirka qalabka xarumaha xogta ee shirkadda, oo dalka oo dhan ah. shaqadayda waa aan jecelahay, waayo xitaa marka ay xaalanduhu sidan hadda oo kale u adag yihiin, waxa aan awood u leeyahay in aan shaqadayda qabsado aniga oo qolkayga hurdada jooga. Si kastaba ha ahaato ee, waxa aan ka xumahay in ay jiraan dad aan iyagu fursaddaas oo kale haysan, oo ku qasban in ay tahagaan goobahooda shaqada oo dadku cidhiidhi ku yihiin." (P4: Cabdullaahi Cabdi, Masuul sare oo ka tirsan shaqaalaha isgaadhsiinta. Muqdisho)

"Waxa aan ahay hooyo shan carruur ah

dhashay, sida oo kale waxa aan masuul ka ahay afar carruur ah oo kale oo uu dhalay walaalkay oo ay Alshabaab dishay. Aniga ayaa nolosha qoyska dabbara. Jidka Maka Almukarama ayaa aan caano xoolaad ku iibiyaa. Waxa aan jeelaan lahaa in aan carruurtayda dugsiga u diro, laakiin dhaqaala-ha aan xoogasadaa iima saamaxayo. Aad ayaa aan uga cabsi qabaa in Coronavirus igu dhaco, waayo dad badan ayaa aanu kulan-naa, qaar badan oo ka mid ahina qufac ayaa ay leeyihiin; Inkasta oo aanan garan Karin in ay Coronavirus qabaan iyo in uu har-gab caadiya yahay." (P5: Faadumo Axmed. Qof ka ganacsada waxyaalaha yaryar ee aan rasmiga ahayn (Jeeble). Muqdisho)

"Anigu waxa aan ahay aabo siddeed carruur ah dhalay; ilmaha ugu yari waa hal sano jir. Nasiibdarro, midkoodna dugsiga ma aado, laakiin marka aan waqt u helo Qur'aankaayaan baraa. Waxyaabo kala duwan ayaa aan ka ganacsadaa, sida dharka la soo isticmaalay ee Huudheyda loo yaqaanno, buugaagta, Baytaryada iyo muraaya-daha qiimaha jaban ee China sameeyso. Maadaama oo aanan lahayn dukaan dhismii-su ma guurto yahay oo ay dadku iigu soo hagagi karaan, waxa aan ku qasbanahay badeecadaha aan iibinayo in aan guryaha geeyo. Mar marka qaarkood waxa aan saaraa miis aan dhigto gurigayga hortiisa." (P6: Shariifoow Maxamed. Qof ka ganacsada waxyaalaha yaryar ee aan rasmiga ahayn (Jeeble). Muqdisho)

"Magacaygu waa Nasra. Waxa aan ahay hooyo saddex carruur ah leh, waxa aan hay-staa dukaan yar oo ah isha keliya ee aan nolosha qoyskayga ka soo saaro." (P7: Nasra Cali. Gabadh, Muqdisho)

"Horraantii 1993-kii ayaa aan ku dhashay magaalada Baydhabo ee dawladgoba-leedka Koonfurgalbeed. Baydhabo ayaa aan ku barbaaray, waxbarashadayda il-



laa dugsi sarena ku qaatay. Muqdisho ayaan u guuray sannadkii 2012 kii si aan u sii dhammaystirto waxbarashadayda heer jamacadeed. Waxa aan bartay dhaqaa-laha oo aan sannadkii 2016 kii shahaadada koowaad ka qaatay jaamacadda Muqdisho. Waxa aan jecelahay in aan ka shaqeeyo u dhaqdhaqaaqista arrimaha dhallinyarada iyo haweenka. Waxa aan ka qaybgalay ku-lan hawleeddo tiro badan oo la xidhiidha xoojinta haweenka. Kuwaas oo aan uga qaybgalay tababarro iyo shirar badan oo lagu qabtay dalal Afrika iyo Carabta ah. Waxa aan hore uga soo shaqeeyey Xarunta Cilmi-Baarista iyo Wadatashiga, waxa na aan ahaa madaxa maaliyadda. (P8: Jamiila Xaaji. Agaasimaha Ururka Himilada Dhallinyarada Koonfurgalbeed (SWYV), Xubin ka tirsan Golaha La-Talinta ee Dhallinyarada ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya. U dhaqdhaqaaq xuquuqda haweenka iyo dhalinayrad. Gabadh ku nool Muqdisho)



da Boorama, oo ku taalla woqoyiga dalka. Imika waxa aan haystaa shahaadada koowaad ee jaamacadda oo cilmiiga dhaqaaalaha ah, waxa aanan ku noolahay kana shaqeeyaa magaalada Muqdisho. Waxa aan ahay qoraa sheekooinka maloawaalka ah alifa, waxa aanan soo saaray buug daabacan iyo sheekoojin gaagaaban oo kala duwan. Marka aanan shaqaynayn waxa

aan jecelahay wax akhriska, hal-abuurka gabayada, iyo in aan garaacdo giitaarkayga ah." (P9: Warsame Cumar. U dhaqdhaqa-aqe arrimaha dhallinyarada ah, qoraa sheekooinka mala-awaalka ah. Waa nin dhallinyaro ah oo ku nool Muqdisho)

"Waxa aan ku dhashay magaala-da Baladweyne. Kaddib waxa uu qoyskayagu Muqdisho u soo guuray aniga oo lix bilood oo keliya jiray. Waxa aan ku koray waxna ku bartay Muqdisho. Ja am a d d a Muqdisho ayaa aan ka bartay cil-miga bulshada. Waxa aan ahay u dhaqdhaqaaqe iyo u ol'oleeye jiilka da'yarta ah ee Soomaaliya sidii ay u heli lahaayeen fursado waxbarasho iyo shaqo. Sida oo kale waxa aan ahay sawirqaade. Waan xiiseeyaa sawirqaadista, waayo waxa aan aaminsan-hay in aan wax ka beddeli karo muuqaal-ka laga haysto Soomaaliya. Sannadkii 2012, waxa aan bilaabay in aan taleefankayga gacanta sawirro ku qaado, kaddibna geliyo baraha aan ku leeyahay Instagram ka iyo Twitter ka. Waxa aan si gaar ah xoogga u saaray taariikhda iyo goobaha quruxda badan, sida xeebta, gaar ahaan jimceyaasha marka ay carruurtu ku ciyaarayaan xeebta." (P10: Zahra Qorane. U dhaqdhaqaaqe arrimaha dhallinyarada. Sawirqaade. Ka mid ah dhallinyarada Muqdisho).



"Waxa aan ka dhashay qoys xoola dhaqato beeraley ah oo ku nool Daafeet, oo ka tirsan degmada Wanlaweyn ee gobalka Shabeelaha hoose. qoyskaygu waxa uu deegaankaas ku dhaqnaa muddo qarniyo ah, laakiin sannadkii 2011 kii ayaa abaarihii ay dileen inta badan xoolihii ay dhaqanayeen, waxa aana baaba'ay dhul beereed-

koodii. Markaas ayaa ay ahayd markii aan go'aansaday in aan aado dalka Sucuudiga si aan uga soo xoogsado, oo qoyska aan u soo biilo. Wuxuu aad galay safar dheer oo aan ku tegey Boosaaso, oo xuuddun u ahayd dadka loo tahriibinayo dalalka Khalijka. Aniga iyo boqollaal dad ah oo kale ayaa doon yar ka raacnay magaalada Boosaaso, 3 maalmood kaddibna wuxuu aanu badqab ku gaadhnay dalka Yemen. Wuxuu ahaa safar cabsi badan, cimilada oo aad u kulu-layd iyo shaqaalaha doonta oo aan dadka siinayn cunto iyo biyo ku filan. Xitaa qof-ka biyo weydiista waa ay garaacayeen. Markii aan Yemen gaadhay, waan sii waday socdaalkaygii oo lug ayaan ku galay Sucuudiga, aniga oo goor habeennimo ah ka tallaabay xuduudka. Saddex sano ayaa aan joogay Sucuudi Carabiya, laakiin noloshii fiicnayd ee aan ka filayey wuxuu ay noqotay cabsi iyo sas ila soo dersay. Wax shaqooyin ah kama aan helin, wuxuu aad nafta ku badbaadin jiray lacag yar oo aan ka shaqaysan jiray gaadhi dhiqista. Saddex sano oo aan Sucuudiga joogay kaddib, waxaa l qabtay ciidamada ammaanka oo baacsanayey dadka sharcidarrada ku jooga Sucuudiga, waxaana dib la iigu soo mustaafuriyey Muqdisho. Imika weli wuxuu aad ku shaqaystaa gaadhi dhiqista, lacagta yar ee aan shaqaystana wuxuu aad u diraa qoyskayga oo ku nool Shabeelaha hoose." (P11: Axmed Cabdullaahi. Qof aan waxna-akhriyin, waxna qorin oo ku nool Muqdisho)

"Waxaa aad ku dhashay kuna barbaaray Muqdisho oo aan la noolaa qoyskayga oo sagaal carruur ah iyo labada waalid ka kooban. Nasiib uma aan yeelan in aan dugsi aado. 19 sano jir ayaa la igu guursaday, kaddibna mar dambe ayaa la i furay. Imika wuxuu aad ahay garoob laba carruur ah ke-lideed korsata, wuxuu aadan ahay shaqaale waqtigeeda oo dhan ku qaadatay soo nadii-finta guryaha qoysaska iyo dhar u dhiqista oo aan ku shaqaysto. Wuxuu aad ku hammi-yaa in carruurtayda aan dugsi waxbarasho u diro si ay naftooda u daryeelaan marka ay weynaadaan." (P12: Nafiisa Xuseen. Shaqaale

nadaafadda ah, aan waxbarasho lahayn oo Muqdisho ku nool)

"Waxaa aad ku dhashay baadiyaha magaalada Afgooye oo ku taalla gobalka Shabeelaha hoose. Markii Alshabaab ay bilowday in ay beegsato dadka iyada oo ku eedaynaysa basaasnimo, ayaa aniga iyo qoyskayga iyo dad kale oo aanu qaraabo nahay ay soo barakaceen. Wuxuu aanu nimi Muqdisho. Hadda aniga iyo toddobada carruur ah ee aan la dhashay wuxuu aanu ku noolnahay xerada barakacayaasha ee degmada Wadajir, magaalada Muqdisho. Wuxuu aad carruurta noloshooda wuxuu aad kala soo baxaa dhar dhiqis aan u sameeyo qoysaska kale." (P13: Fariido, barakace ku nool Muqdisho)

"Qoyskaygu Wuxuu aad ku soobarka acay deegaanka Goofguduud, ee gobalka Bay, sannadkii 2006. Wuxuu aad ku dhashay waqtigii daw-laddii ku meelgaarka ahayd ee Federaalka iyo Itoobiya ay dagaalka gacan ku haynta goballada Koonfurta Soomaaliya kula jireen midowgii Maxaakiimta. Deegaanka abaaro ba'an ayaa ka jiray iyo colaadda oo u dheera. Taas ayaa aniga iyo qoyskayga nagu qasabtay in aanu hadba meel u guurno, annaga oo raadinayna meel aanu ku badbaadi karno. Ugu dambayntii waanu kala qaybsannay oo anigu wuxuu aad Muqdisho u soo guuray sannadkii 2016, wuxuu aana ka bilaabay shaqooyin kala duwan oo darawalnimo ka mid tahay. Wuxuu aad weli ku noolahay xerada barakacayaasha, waayo kirada ayaa qaali ah oo guryaha magaalada uma guuri karo. Qofku marka uu barakace noqdo waa ay ku adagtahay in uu noloshii caadiga ahayd ku soo noqdo." (P14: Aadan Cabdiraxmaan, Barakace ku nool Muqdisho)

"Waxaa aad ahay hooyo 10 carruur ah dhashay. Carruurta qaarkood waa dad waaweyn oo xasaas ah carruurna sii dhalay. Wuxuu aad ku noolahay carruurta intii yaryarayd iyo saygayga oo wata gaadhi-mooto uu xashiishka ku guro. Halkan Muqdisho ayaa aad ku dhashay noloshayda oo dhanna hal-

kan ayaa aan ku qaataay." (P15: Gabadh ka dhalatay qabiilka laga tirada badan yahay ee Ajuuraan)

"Anigu hooyo shan carruur ah dhashay ayaa aan ahay. Waxa aan ku shaqaystaa kalkaaliso cunto kariye, laba carruurta ka mid ah ayaa aan awooday in aan dugsiga geeyo. Waxa aan ka soo jeedaa magaalada Baydhabo, tan iyo markii aan dhoorrayda ahaana waxa aan ku noolaa Muqdisho. Marka aanan shaqo haysan, waxa aan jecelayahay in aan waqtigayga la qaato qoyskayga iyo carruurtayda." (P16: Xaawo Ibraahim, guri joog, waxa ay ka dhalatay qabiilka laga tirada badan yahay ee Ajuuraan, waxa aanay ku nooshahay Muqdisho)

"Aabahay oo xirfadda birta aad u yaqaannay ayaa anigana l baray. Imika waxa aan ka shaqeeyaa Geerash yar oo ku yaalla Wadajir, gunnada aan helaa waxa ay ku xidhan tahay hadba tirada macaamiisha aanu helno. Aniga hammigaygu waa in aan si aad ah u shaqeeyo si aan u kaydsado lacag aan ku furto Geerash aan anigu iska leeyahay. Si kastaba ha ahaato ewaqtigan kharashaad ayaa igu socda oo ay tahay in aan bixiyo, sidaas awgeed lacag kasta oo aan xoogsadaa waxa ay dib ugu noqotaa qoyskayga oo ka kooban afar carruur ah, xaaskayga iyo aniga hooyaday." (P17: Maxamed Axmed, tumaal, shaqaale hoosaad ah oo ka soo jeeda qabiilka Gabooye, kuna nool magaalada Muqdisho)

"Waxa aan ahay hooyo keligeed korsata saddex carruur ah. Dhalashadaydu waa Soomaali-Yemeni, laakiin waxa aan ku dhashay kuna koray Yemen. Markii uu dagaalku ka dhacay Yemen waxa aan u soo qaxay Soomaaliya. Waxaa ila socday ayeyaday iyo abtigay oo aan imika la noolahay. Lixdii sano ee u dambeeyey waxa aan ku shaqaysanayey xirfadda cunto karinta, muddadaas waxa aan bartay wax badan oo cunto karinta ku saabsan. Cunto karintu iima aha shaqo aan ku xoogsado oo keliya, balse waa ii xirfad. Maalin kasta waxa aan

isku dayaa in aan barto xirfado cusub oo cunto-karinta ah, aniga oo daawada barnaamiyada cunto karinta ee talefishannada. Si kastaba ha ahaato e ma soo minguriyo cunto karinta aan daawado, waxa keliya aan doonaa in aan ruux iyo dhiirrigelin ka helo, kaddibna aan cunto karintayda ka dhiigo mid aniga hal abuurkayga ku timi." (P18: Gabadh ka soo jeeda dadka laga tirada badan yahay ee somali-Yemen oo ku nool Muqdisho)

"Waxa aan ahay xoola dhaqato 52 sano jir ah. noloshayda badankeedii waxa aan ku qaataay baadiyaha ka baxsan magaalada Muqdisho, halkaas oo aan kula noolaa qoyskayga oo ka kooban toddobada carruur ah iyo xaaskayga. Waxa aanu leenahay laba halaad (Laba neefoo geel ah). Arooryo kasta marka aan hurdada ka soo kaco, geela ayaa aan lisaa, kaddibna caanihiisa qaadaa oo aan lug ku tagaa Muqdisho si aan caanaha ugu iibiyo. Lacagta Caanaha ka soo baxda waxa aan ku soo iibsadaa baahiyaha qoyska oo raashin u badan. Geelu waxa uu caano leeyahay qiyaas ah 18 ilaa 24 bilood. Laakiin marka uu gudho, labada halaadba waa aan iibiyaa, oo laba cusub oo irmaan ayaa aan sayladda dib uga soo iibsadaa, si aan caano uga helo. Sannado badan ayaa aan sidan u soo dhaqmayey, waanan xiiseeyaa." (P19: Cali Dhuux, Xooladhaqato, Muqdisho joogay)

Hargeysa

"Waxa aan ka qalin-jebiyey jaamacadda Hargeysa, kaddibna shaqo waayoaragnimo korodhsii ah ayaan kula shaqeeyey Kuliyadda King's College ee London. Waxa aan korameere u ahaa ardayda heerka koowaad ee kuliyad caafimaad, sida oo kale sannadkii 2017 kii waxa aan tabaruc kula shaqeeyey hay'ado aan dawli ahayn, oo aan lasameeyey cilmibaadhis ku aaddan haweenka gobaha shaqada. Kaddib waxa aan shaqo ka



bilaabay cisbitaalka Edna Aadan, aniga oo dhinaca kalana weli sii waday waxbarashada oo aan diyaarinayey Dibloomada ka dambaysa shahaadada koowaad ee jaamacadda (Post graduate Diploma) oo aan ku baranayey caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Isla markaasna, waxa aan bare ka ahaa jaamacad kale. Kaddib bilowgii 2020 ka waxa aan shaqo ka bilaabay hay'adda 'Health Poverty Action. Waxa kale oo aan xubin ka ahay ururka dhakhaatiirta haweenka ah ee Somaliland, waxa aanan la shaqeeyaa wasaaradda caafimaadka." (P21: Dr. Maryan Maxamed X. Xuseen. Waxa ay ka mid tahay masuuliyyinta dawladda ee caafimaadka oo darajada dhexe ah, Hargeysa)



dhiidha shaqada. Waxa aan la-taliye dhanka xidhiidhka iyo war-isgaadhsiinta ah u ahay Guddiga Shaqaalaha Rayidka, gaar ahaan mashruuca Bangiga Adduunka ee waaxda Shaqada." (P22: Rooble Maxamed. La-Taliye dhanka xidhiidhka iyo war-isgaadhsiinta. Masuul shaqaalaynta dawladda ka tirsan oo darajada dhexe ah, Hargeysa)



"Da'daydu waa 18 sano jir, waxa aan la noolahay qoyskayga oo ka kooban; hooyaday,aabahay, ayeeyaday iyo adeerkay oo 15 sano jir ah. Waa arrin lala yaabi karo, laakiin waa ka loogu jecelyahay. Waxaa iyaduna jirtaaabahay walaashii oo ay kala bah yihiin oo toban bilood oo keliya jirta

imika. Awoowgay waxa uu dhalay 18 carruur ah. Waxa kale oo aan la noolahay saddex wiil iyo laba hablood oo ah walaalahay oo iga da' yar. Hooyaday ayaa na daryeesha, aabahay waxa uu ka shaqeeyaa mashruuca GEEL. Muddo dhoweyd oo illaa laba bilood laga joogo ayaa uu soo guuray. Waqtiga aan firaaqada hayo waxa aan isku qariyaa qolkayga oo aan buugaagta ku akhristo. Waxaa hadda igu soo fool leh imtixaanaad-kii sidaas awgeed wax akhriska kale muhiim-adayda koowaad ma'aha. Waxa aan ahay ardayda sannadkan bilowday jaamacadda Hargeysa, waxa aan bartaa cilmiga bulshada. Runtii aad ayaa uu cilmigani uga fiican yahay sidii aan moodayey. Waxaa jira casharrada qaar aanu ku qaadanno afafka Carabiga iyo Soomaaliga, laakiin wax kale oo kastaa waxa uu ku baxaa afka Ingiriisiga. Wax yaabaha kale ee aan jecelahay in aan Hargeysa ka qabto; guriga adeerkay waxa uu ku dhowyahay taag yar oo buur dhagx-an leh ah, waa meel aad u fiican in la eego marka ay galabtii qorraxdu hoyanayso. Sida oo kale waa meel ay adagtahay koritaankeeda iyo ka soo degisteeda labaduba." (P23: Haboon Kaysar. Masuul hoosaad dawlaadeed)

"Magacaygu waa Axmed. Waxa aan ku dhashay caasi-madda Jamhuuriyadda Somaliland ee Hargeysa sannadkii 1987 kii. Dugsi Qur'aanka waxa aan ka bilaabay Hargeysa, kaddib dugsiga hoose/dhexe iyo sare waxa aan ku qatay Hargeysa. Intaas kaddib, waxa aan galay jaamacadda Hargeysa oo aan ka qalinjebiyey. Ugu dambayntii waxa aan bilaabay shaqo yar oo ii gaar ah, taas oo aan illaa hadda ka shaqeeyo." (P25: Axmed Ibrahim Muxumed, Ganacsade hawlaha yaryar ee aan rasmiga ahayn, Hargeysa)



"Magacaygu waa Asma. Waxa aan ahay



20 sano jir, waxa aanan ku noolahay xaa fadda Calaamadaha ee Hargeysa. Hadda waxa aan la noolahay saygayga. Laakiin weli aniga ayaa wax siiya carruurta aanu walaala-ha nahay oo aad u yaryar. Imika ninkaygu shaqo ma hayo." (P26: Asma Aweys. Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn, Hargeysa)



"Magacaygu waa Suleekha. Dabayaqa qadii 1970-naad-kii ayaa aan ku dhashay gobalka Gebiley. Markii aan dugsiga hoose dhammmaystay ayaa ay dawlad-dii Soomaaliya burburtay. Waxa aan u qaxnay dal-ka Jabbuuti oo aan ka siid waday barashada afafka Ingiriisiga iyo Carabiga, laakiin isagiina ma'aan dhammaysan. Waxa aan dib ugu soo noqday Gebiley waxa aanan bilaabay in aan xirfadayda dhiso. Waxa aan go'aans-day in aan ka shaqeeyo waaxda caafimaad-ka, tabaruc ahaanna kaga shaqeeyo cis-bitalka Gebiley. Markaas kaddib waxa aan u guuray Hargeysa oo aan galay Machadka caafimaadka ee Hargeysa. Waxaa la ii tababaray umulisonimo aan si guul leh u dhammystay. Kaddib waxa aan shaqo ka bilaabay shirkad isgaadhsiineed oo aan afar sano ka shaqaynayey, waan guurs-day waxa aanan noqday guri joog. Imika waxa aan leeyahay shan carruur ah, waxa aanan dib u bilaabay in aan iskay u shaqa-ysto. Waxa aan ahay ganacsade yar, oo alaaboojin yaryar ku iibiyaa meel aan guri-gayga ka fogeyn." (P27: Suleekha Cabdillaahi Ismaaciil, Ganacsade yar, gabadh, Hargeysa)

"Magacaygu waa Farduus, waxa aanan leeyahay waxbarasho dhinaca sharciga ah. Waxa aan maamulaa mashruuc loo yaqa-

anno, 'Hindisaha Siraad, oo ka shaqeeya xoojinta sidii ay dumarku uga qa-ybgeli lahaayeen siyaas-adda. Waxa aanu wax-oogaa yar oo maalgelin ah ka heli jirnay saaxiib-bada deegaanka ee fikir-kan xiiseeyey. Xanuunkan COVID-19 ayaa isbeddel ku keenay qorshahay-agii iyo waxqabadkii mashruuca. Waxa aan qorshaynaynay in aan qabanno tababbaro, aana abaabulno mu-naasabado aan mashruuca deeq uga raadi-nayo ururrada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee Somaliland ka hawlgala, si aan u horumarino xirfadda iyo aqoonta gabdhaha. Qorshayaashaas iminka waa aan hakinnay inta laga soo kabanayo xaaladda COVID-19 ee hadda lagu jiro." (P28: Farduus Maxamed, Cilmibaadhe, gabadh ku nool Hargeysa)



"Magacaygu waa Hodan. Waxa aan ahay curadda qoyska. Aniga oo welii aad u yar ayaa aan shaqo bilaabay si aan no-losha qoyskayga u kabo. Aniga oo dhoorray ah ayaa uu aabahay dhintay, hooyaday ayaana na soo korisay; hawl fudud uma ay ahayn korintaa-si. Waxa aan doonayaa in walaalahay ay helaan fursadihiin aan anigu waayey; waxa aan doonayaa in ay dugsiga dhammystaan oo ay jaamacad galaan." (P29: Hodan Axmed, Koonfeer, dhalinyaro Hargeysa joogta)



"Magacaygu waa Cabdiwahaab, waxa aan ku noolahay magaalada caasimadda ah ee Hargeysa. Waxa aan ahay arday jaamacadeed oo caafimaadka barta. Imika waxa aan ku jiraa sannadkii shanaad ee wax-barashada oo aan ka dhigto jaamacadda Frantz Fanon. Waxa aanu barannaa qaliin-




ka, neerfaha, dhimirka iyo daweynta xaalada-ha degdegga ah. Waxa aan doonayaa in aan dhakhtar qalniin noqdo. Qoyskaygu waxa uu ka kooban yahay shan hablood iyo saddex wiil oo aanu walaalo nahay, da' ahaan dhexda ayaa aan ugu jiraa walaalahay. Qaarkood guri-ga ayaa ay joogaan, inkasta oo waqtiyadan uu Coronavirus ku jiro aanu dhammaantayo guriga joogno. Hooyaday waa macallimad dhigta maadadda xisaabta. Anigu se xisaabta ma xiiseeyo." (P30: Cabdiwahaab Daa'uud. Dhalinyaro, Hargeysa)



"Magacaygu waa Najaad, waxa aan ahay 23 sano jir. Waxa aan la dhashay shan carruur ah oo aan lix ku ahay. Waxaa iyaguna guriga nagula nool carruur uu dhalay walaalkay oo iga weyni. Waxa aanu ku noolnahay aqal yar oo ku yaalla dugsiga Faarax Oomaar ka soo horjeediisa, halkaas oo aan ku lahaan jiray maqaaxi shah, laakiin imika waa ay xidhantahay. Hore waxa aan uga shaqaysan jiray xinnaha farshaxanka ah ee dumarka loo mariyo, waxa aanan ka shaqayn jiray koofeerro kala duwan." (P31: Najaad Xuseen. Maqaaxi leh, aan waxbarasho lahayn, Hargeysa)

"Magacaygu waa Cali. Waxa aan ahay 50 sano jir, waxa aan ku dhashay baadiya. Waxa aan masuul ka ahay lix carruur ah oo aan dhalay iyo hooyadood. Waxa aan hadda ku noolahay magaalada Hargeysa. Weligay dugsi waxbarasho ma tegin. Laakiin waxa

aan isbaray xirfad farsamo oo ah makaaninmo aan ga-waadida kaga shaqeeyo, taas oo aan Hargeysa ka bi-laabay markii aan 15 sano jirka ahay. Gacanyare darawal gaadiidka xamuulka ah ayaa aan noqday sannadihii 1980-maadkii, kaddib darawal gawaadhi-da xamuulka ah ayaa aan muddo dheer ahay. Dhowr sano ka hor, ayaa aan galay shil naafo iga dhigay, gacanta bidix na waa la iga jaray. Markii aan ka soo bogsaday dhaawacaas waxa aan furtay mee-hrad yar oo aan ku iibiyo qalabka gaadiidka ee la soo isticmaalay. Waxa ay ku soo jeedda jidka weyn ee u dhow saldhigga bilayska ee degmada Koodbuur. Ganacsigaygaas ayaa aan maamulaa." (P32: Cali Cabdi Muxumed, libiye qalabka gaadiidka, aan waxbarasho lahayn, Hargeysa)



"Magacaygu waa Nuura. Waxa aan ahay da'da labaad ee shan carruur ah oo aan la dhashay, hooyaday oo keliya ayaa i soo korsatay; aabahay iyo hooyaday waxa ay kala tageen aniga oo aad u da' yar. Muddo hadda shan sano ah waxa aanu ku noolnahay xerada barak-acayaasha ee Stage House ka. waxa aanu ka soo barakacnay xero qaxoonti oo ku taalla Aw Barre [degganka Soomaalida Itoobiya]. Waxa aanu ka diiwaangashanayn hay'adda qaramada midoobey ee qaxoontiga (UNHCR) waxa aanu qorshuhu ahay in ay noo qaaddo dalka Maraykanka, laakiin hawshaasi ma'ay suurtagelin. Sidaas aw-geed hooyaday waxa ay go'aansatay in ay na geysa magaalada Burco, waayo waa ay



ka nolol jabantahay Hargeysa. Imika waxa aan ku noolahay xaafadda Shacabka ee magaalada Hargeysa oo aan la joogo eedaday, iyada ayaana i daryeesha." (P33: Nuura, Maqaaxi shaah ayaa ay leedahay, Barakace, Hargeysa)



"Magacaygu waa Cabdillaahi. Waxa aan dhammaystay waxbarashadaya oo illaa dugsiga sare. kaddib waxa aan ku biiray barnaamij tababarka macallimiinta ah. Waxa aan ku biiray barnaamijkan waxbarashada ee wasaaradda waxbarashada oo ay bixiso jaamacadda Golis, maalge-lintiisana uu bixiyey midowga Yurub, waxa aan ka qaatay shahaado Diblooma waxbarashada ah. waxa aan leeyahay waayoarag-nimo 28 sannadood oo waxbarashada ah, waxa aanan ka gaadhay darajada maamule dugsi oo aan ka ahaa dugsiga hoose ee Sheedaha oo ku yaalla magaalada Hargeysa." (P33: Cabdillaahi. Barakace, Hargeysa)



"Magacaygu waa Maxamed, sannadkii 1975 kii ayaa aan ku dhashay magaalada Gebiley. Waxbarashada waxa aan ku qaatay dalka Jabbuuti, waxa aan ka qalinjebiyey machadka Islaamiga ah ee Jabbuuti. Sannadkii 1999 ayaan dib ugu soo noqday dalkayga Somaliland. Isla sannadkaas ayaa aan bilaabay shaqadaydii ugu horreysay oo macallinnimo

ahayd. Sannadkii 2010 kii waxa aan maamule ku xigeen ka noqday dugsiga hoose ee Sheekh Cali Ibraahim, oo Hargeysa ku yaalla. Kaddib sannadkii 2015 kii ayaa aan maamule ka noqday isla dugsigaas, illaa maantana waa aan ahay." (P35: Cabdullaahi Cabdi Muxumed. Maamule Dugsi, Qabiil loo awood-sheegto(Madigaan – Dir), Hargeysa)

"Magacaygu waa Xaliimo. Ganacsigan aan haysto waqtidheer ayaa aan ku soo dhex jiray, nasiibwanaag du-kaankaygu waxa uu igu yaalla gurigayga hortiisa. Waxa aan ku faraxsanahay in aan ka helo kharashka aan ku bixiyo kirada iyo sida oo kale biilk." (P36: Xaliimo Xuseen. Mulkiile dukaan. Ka dhalatay qabiilka laga tirada badan yahay ee Jaarso, Hargeysa)



"Waxa aan ku dhashay degsiimada Hawlwadaag ee Hargeysa, bishii Diisambar 1984 kii. Markii uu dagaalku Hargeysa ka qarxay sannadkii 1988 kii, waxa aanu u baxsannay magaalada Xarshin ee Itoobiya halkaas ayaa aan dugsi Qur'aan ka bilaabay. Kaddib waxa aan dugsi ka bilaabay Xarshin, oo aan ku soo dhammaystay illaa fasalka lixaad. Markaas kaddib waxa aan u guuray magaalada Jigjiga oo aan ku dhammaystirtay dugsiga sare. Intaas wixii ka dambeeyey waxa aan bilaabay in aan qoyskayga noloshooda dab-



baro, hawshaas oo aan weli wado. Waxa aan nolosha qoyska ka soo saaraa ganacsimeherad rayisle ah oo aan haysto. Xaas iyo carruur ayaa aan leeyahay." (P37: Mukhtaar Xareed Ismaaciil, Timo-jare, shaqaale hoosaad ka soo jeeda qabiilka Gabooye. Hargeysa)

"Waxa aan ahay arday jaamacadeed, waxa aanan ku shaqaystaa macalinnimo dugsi oo mushahar yar aan ka qaato. Al-xamduuillaah, waxa aan lahaa guri yar, laakiin markii uu dagaalku ka dhacay magaalada Sanca ee dalka Yemen ayaa uu gurigii ku dumay. Waxa aan dhalay wiil keliya oo markaas jaamacadda dhiganayey, baaskiil ayaa uu u kaxaysan jiray jaamacadda maadaama aanan awoodi Karin in aan ka bixiyo kharashka gaadhiga geynaya jaamacadda. Waxa aanu ku noolayn duleedka magaalada oo ah woqooyiga magaalada caasimadda ah, meel u dhow gegida diyaaradaha ee Sanca jaamacadduna aad ayaa ay nooga durugsanayd. Baaskiilkayay ahaa gaadiidka keliya ee uu ku tegi karaayey. Si kastaba ha ahaato ee Xuutiyiinta ayaa ka qaaday baaskiilkii, iyaga oo ku andaconaya in uu ciyaaro waxaa ka habboon in uu tago furimaha dagaalka. Marar badan ayaa ay ku xad gudbeen. Ugu dambayntiina ras-aas ayaa ay u qaateen, iyaga oo ugu hajabaya in ay dili doonaan haddii uu diido in uu dagaalka ka qaybgalo. Qof kasta oo iyaga ka cabsi qabay waxa uu raadsaday meel uu ku badbaado oo ka baxsan dalka Yemen. Waxa aan maqlay Somaliland iyo in ay ka jirto hay'adda qaramada midoobey u qaabilan qaxoontiga ee UNHCR oo caawisa qaxoontiga halkaas taga, kuna taageerta mashaariic. Waxa aan iibiyey waxoogaa dhab ah, iyo dhammaan qalabkii guriga noo yaallay, si aan ugu bixiyo kharashka aanu halkan ku nimi. Sida oo kale deyn ayaa aan ka amaahday dad aanu saaxiibbo nahay. Waxa aanu tagnay magaalada Cadan, si aan baasaboor ugu soo saaro inantayda, aniga iyo ninka inantayda qaba; waayo

waxa aan ka cabsi qabay in aan keliday safro oo aan iyagana ka tago. Inantaydu waxa ay iyaduna iibisay dahabkeedii, si ay u bixiso kharashka baasaboorka loogu soo saarayo iyada iyo ninkeeda. Inkasta oo ay aad u xanuunsanaysay haddana waa ay nala safartay. Ma'anu doonayn in aanu ku kala hadhno meeshan Sanca oo ay ka jireen weerarro joogto ahi. Al-xamduuillaah, waa aanu tagnay Cadan, waanuna la soo baxnay baasaboorki. Laakiin waxaa yaab nagu noqday doontii aanu raaci lahayn oo muddo dib dhacday. Muddo bil ah ayaa aanu sii joognay Cadan, illaa aanu helnay dooni imanaysay magaalada Berbera ee Somaliland. Muddadii aanu doonida sugaynay lacag badan ayaa nagaga baxday huteelka aanu deggenayn iyo cuntada. Magaalada Berbera waxa aanu nimi 6-dii bishii Feebarweri 2018. Waxaa na qaabishay hay'adda UNHCR. Muddo toddobaad ah ayaa aanu xero ku jirnay. Kaddib waxaa lanoo soo gudbiyey Hargeysa, oo qofka keliya ee aanu ka garanaynay uu ahaa gabadh aanu walaalo nahay oo xerada nagula jirtay. Iyada ayaa naga caawisay in aanu helno hoy aanu degno. Guri ayaanu muddo dheer kula jirnay qoys kale oo Soomaali ah, laakiin imika hoy noo gaar ah ayaa aanu leehay." (P38: Samiira Al-Qatwaani, Guri joog, Gabadh yemeniyad ah oo joogta Hargeysa)

"Aniga magacaygu waa Cabdirashiid, waxa aan dhashay 1969 kii. Waxa aan dhashay isla waqtigii la khaarajiyey madaxweynihii hore ee Soomaaliya cabdirashiid Cali Sharmaarke. Waxa aan ka soo jeedaa qoys xoola-dhaqato beeraleya ah, waxa aanan ku barbaaray baadiyaha degmooyinka Gebiley, Boorama iyo Xarshin. Halkaas oo uu qoyskaygu ku haystay



xoolo. Waxa aan helay waqtii yar oo aan Qur'aanka ku bartay. Waxa aanu haysannay awr iyo lo', waxaana aan qodi jiray beertayada. Markii aan guursaday, ee aan qoys yeeshay waxa aan u guuray meel waalidkay ka durugsan. Imika beer aan anigu leeyahay ayaan qotaa, waxaan ugu haysaa tiro yar oo xoolo ah. Waa sidaas sida aan u noolahay ee aan masuuliyadda qoyskayga uga soo baxaa." (P39: Cabdi Muuse Taani, Xooladhaqato iyo beeraley, baadiyaha Hargeysa)

"Magacaygu waa Cabdillaahi, waxa aan ku dhashay deegaanka Soomaalida Itoobiya, meel ku dhow magaalada Harta Sheekha. Halkaas ayaa aan ku barbaaray oo Qur'aanka aan ku bartay. Kaddib waxa aan u guuray magaalada Wajaale si aan uga sii wado waxbarashada diinta Islaamka, kaddib

waxa aan tegey dal-ka Jabbuuti oo aan ka sii waday wax-barashadii dugsiga sare oo barashada Islaamak ah. Waxa aan ku soo noqday Wajaale oo aan ka noqday macallin Qur'aan, shaqadaas oo aan illaa hadda Hargeysa ku hays-to. Al-Xam dulillaah, da'daydu waa 52 sano jir." (P40: Sheekh Cabdillaahi Ibraahim, Nin Naaf ah oo ku nool Hargeysa)



WALAACYADA JIRA

Tusaha 3: Walaaca ugu weyn ee laga qabo saddexda bilood ee soo socda – Muqdisho

Marka aad ka fikirto Saddexda bilood ee soo socda, Fadlan noo sheeg Sida uu yahay warwarka aad adiga iyo qoyskaagu qabtaan iyo waxa aad ka warwaraysaan

	Aad u welwelsan	Yara welwelsan	Aan welwelsanayn	Ma ogi / Ka ma jawaabin
In uu igu dhaco fayraska COVID-19	17	2	1	0
In uu igu dhaco xanuun kale oo aan ahayn COVID-19	1	11	8	0
Xanuun Dhimirka Ah	0	6	13	1
In Xayiraadaha COVID-19 ku keenay awgood aan dakhligayga waayo	14	3	2	1
In aan heli waayo baahiyaha aasaasiga ah	9	8	3	0
In la igu takooro cidda aan ahay awgeed	0	13	6	1
Gacan ka hadal	4	9	6	1
Wax kale	2	1	1	16

Tusaha 4: Walaaca ugu weyn ee laga qabo saddexda bilood ee soo socda – Hargeysa

Marka aad ka fikirto Saddexda bilood ee soo socda, Fadlan noo sheeg Sida uu yahay warwarka aad adiga iyo qoyskaagu qabtaan iyo waxa aad ka warwaraysaan

	Aad u welwelsan	Yara welwelsan	Aan welwelsanayn	Ma ogi / Ka ma jawaabin
In uu igu dhaco fayraska COVID-19	19	0	0	1
In uu igu dhaco xanuun kale oo aan ahayn COVID-19	4	2	9	5
Xanuun Dhimirkha Ah	2	8	7	3
In Xayiraadaha COVID-19 ku keenay awgood aan dakhligayga waayo	17	2	1	0
In aan heli waayo baahiyaha aasaasiga ah	13	4	2	1
In la igu takooro cidda aan ahay awgeed	4	4	3	9
Gacan ka hadal	3	6	3	8
Wax kale	5	4	3	8

SAAMAYNTA UU KU LEEYAHAY DADKA KALE IYO URURRADA

Tusaha 5: Saamaynta uu ku leeyahay dadka kale iyo ururrada – Muqdisho

Imika Maxay dadka kale ama ururradu saamayn ku leeyihii naftaada ama qoyskaaga?

	Xaaladda ayaa ay aad u sii wanaajiyeen	Xaaladda ayey yara wanaajiyeen	Saamaynba may yeelan	Xaaladda ayey yara xumeeyeen	Xaaladday aad u sii xumeeyeen	Ma ogi / Ka ma jawaabin
Qoyska, Saaxiibbada, iyo Qaraamada dalka joogta	2	4	10	2	0	2
Qoyska, Saaxiibbada, iyo Qaraamada Qurbaha ku maqan	5	3	8	2	0	2
Jaaliyaddaada ama kooxdaada bulsho	2	4	10	1	0	3
Jaaliyad ama koox bulsho oo kale	0	3	12	1	0	4
Dawladda dhexe	6	6	5	2	0	1
Dawladda Hoose	6	6	5	1	1	1
Ganacsiga	0	4	3	12	0	1
Masaajidka	2	2	8	5	2	1
Hay'adaha maxalliga ah	1	10	7	1	0	1
Ururrada iyo hay'adaha Caalamiga ah	1	8	8	1	1	1
Dalalka Shisheeye	4	6	8	1	0	1
Cid kale	0	0	3	0	0	17

Tusaha 6: Saamaynta uu ku leeyahay dadka kale iyo ururrada – Hargeysa

Imika Maxay dadka kale ama ururradu saamayn ku leeyihiin naftaada
ama qoyskaaga?

	Xaaladda ayaa ay aad u sii wanaajiyeen	Xaaladda ayey yara wanaajiyeen	Saamaynba may yeelan	Xaaladda ayey yara xumeeyeen	Xaaladday aad u sii xumeeyeen	Ma ogi / Ka ma jawaabin
Qoyska, Saaxiibbada, iyo Qaraamada dalka joogta	1	3	6	1	1	8
Qoyska, Saaxiibbada, iyo Qaraamada Qurbaha ku maqan	2	6	2	2	0	8
Jaaliyaddaada ama kooxdaada bulsho	0	5	9	2	0	4
Jaaliyad ama koox bulsho oo kale	0	3	6	0	0	11
Dawladda dhexe	0	9	3	2	2	4
Dawladda Hoose	0	3	10	0	1	6
Ganacsiga	1	3	8	2	1	5
Masaajidka	1	6	7	2	0	4
Hay'adaha maxalliga ah	1	6	9	0	0	4
Ururrada iyo hay'adaha Caalamiga ah	1	2	8	0	0	9
Dalalka Shisheeye	0	6	6	0	0	8
Cid kale	0	1	2	0	1	16

SUURTAGALNIMADA CAABUQA COVID-19

Tusaha 7: Suurtagalnimada caabuqa COVID-19 – Muqdisho

Ma u malaynaysaa in adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah uu hore ugu dhacay Coronavirus ama uu hadda hayo?m
Hadday jawaabtaadu tahay 'HAA' ama 'Laga yaabaa' Maxaad sidaas ugu malaysay?

Haa	Laga yaabaa	Maya	Ma ogi / Ka ma jawaabin
6	3	10	1

Tusaha 8: Suurtagalnimada caabuqa COVID-19 – Hargeysa

Ma u malaynaysaa in adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah uu hore ugu dhacay Coronavirus ama uu hadda hayo?m
Hadday jawaabtaadu tahay 'HAA' ama 'Laga yaabaa' Maxaad sidaas ugu malaysay?

Haa	Laga yaabaa	Maya	Ma ogi / Ka ma jawaabin
2	3	13	2

XOG LA XIDHIIDHA SIDA LOOGA HORTEGI KARO CAABUQA: RAADKA UU KU YEESHO SHUCUURTA QOFKA

Tusaha 9: Xog la xidhiidha sida looga hortegi karo caabuqa: Raadka uu ku yeesho Shucuurta qofka – Muqdisho

Markii aad maqashay sida la isaga ilaalin karo qaadista ama faafinta xanuunka, Dareenk ay adiga ama qoyskaaga ku yeelatay side uu ugu dhowaa?

Si sidii hore ka wacan ayaan dareemay waayo nafahayaga waa aanu ka badbaadin karaynay	Waxba iskama ay kay beddelin	Cabsidii ayaa igu sii badatay, waayo wax badan kama aan qaban karayn	Ma ogi / Ka ma jawaabin
5	5	10	0

Tusaha 10: Xog la xidhiidha sida looga hortegi karo caabuqa: Raadka uu ku yeesho Shucuurta qofka – Hargeysa

Markii aad maqashay sida la isaga ilaalin karo qaadista ama faafinta xanuunka, Dareenk ay adiga ama qoyskaaga ku yeelatay side uu ugu dhowaa?

Si sidii hore ka wacan ayaan dareemay waayo nafahayaga waa aanu ka badbaadin karaynay	Waxba iskama ay kay beddelin	Cabsidii ayaa igu sii badatay, waayo wax badan kama aan qaban karayn	Ma ogi / Ka ma jawaabin
5	5	10	0

TALLAABOOYINKA LOO QAADAY NOLOSHA, MACIISHADA IYO KA WADA QAYBGALKA

Tusaha 11: Tallaabooyinka loo qaaday dhinaca nolosha – Muqdisho iyo Hargeysa

Adiga iyo qoyskaagu 'Coronavirus' awgii ma qaaddeen wax ka mid ah tallaabooyinkan, ama waxa laga qabtay ka jawaabista Fayraskan.

Gacmahaaga aad ugu maydhay saabuun	39
Iska ilaalisay in aad dad badan dhexgasho	30
Suxulka afka ku dabooshay marka aad hindhisayso ama qufacayso	29
Isku dayday in aanad taaban indhaha, sanka ama afka	23
Bilowday in aad sanka iyo afka xidhato (Sanka iyo Afka wax unu ku daboosho sida, Maskaaro, Masar, ama Niqaab)	22
Bilowday Iisticmaalka dareeraha jeermis-dilaha ah ee gacmaha ama sidii hore si ka badan u isticmaashay	21
Isku dayday in aad ilaalso caafimaadkaaga guud	18
Walxaha aad isticmaalayso ku maydhay Saabuun ama ku nadiifisay dareere Jeermis-dile ah ama wax kale	17
Isku dayday in aad ugu yaraan 2 Mitir u jirsato qofka, marka aad guriga bannaankiisa joogto.	16
Iska ilaalisay in aad taabato maskaarada wejiga aad ku dabooshay iskana ilaalisay in wax kale aad taabsiiso illaa aad saabbuun ku dhaqdo	15
Iska ilaalisay ama isku dayday in aad ka hortagto gacan ka hadalka (Tusaale ahaan ku wargelisay roonada bilayska	9
Gurigaaga isugu keentay dadka ehelka ah	5
Isku dayday in waayeelka, dadka aan caafimaadkoodu fiicnayn ama dadka qoyska ah ee bukaanka ah in ay intii suurtagal ah noloshoodu dadka kale oo dhan ka soocnaato	5
Iska ilaalisay taabashada maydka qofka ka dhintay qaraabadaada	2
Ehelkaaga u dirtay baadiyaha	0

Tusaha 12: Tallaabooyinka loo qaaday dhinaca Maciishada – Muqdisho iyo Hargeysa

Coronavirus awgii adiga ama qoyskaagu ma qaaddeen wax tallaabooyinkan ka mid ah ama waxa la qabt looga jawaabo **Coronavirus**?

Markii bandooga Coronavirus la soo rogay, ma heshay hab aad shaqadaada ku sii wadan karto, ama guriga kaga bixi karto (Hadday jirto mid ka mid ah hababkaas sheeg)	11
Wax ma kaydsatay, sida Raashinka	7
Lacag ama badeecad kale ma amaa hatay	5
Deyn ma iska bixisay ama lacag ma dhigatay	4
Shaqo dheeraad ah ama tii hore ka duwan ma qabatay	4
Ma ku biirtay barnaamij lacag xawilaad ah	3
Ma bixisay Lacag ama caawimo kale oo dheeraad ah	2

Tusaha 13: Tallaabooyinka loo qaaday dhinaca ka wada qaybgalka – Muqdisho iyo Hargeysa

Coronavirus awgii ama jawaabta laga bixiyey xakamaynta Coronavirus darteed adiga iyo qoyskaagu tallaabooyinkan ma qaaddeen?

La macaamilkaaga iyo dabeecadahaaga ku aaddan nooc gaar ah oo bulshada ka mid ahi ma yahay mid ku dhisan niyadsamaan?	25
Weli ma qarisay wax ka mid ah cidda aad tahay, tusaale ahaan qabiilkaaga ama isirka aad ka soo jeeddo.	1

Tusaha 14: Tallaabooyinka kale ee la qaaday – Muqdisho iyo Hargeysa

Adiga iyo qoyskaagu ma qaaddeen wax tallaabooyinkan ka mid ah, coronavirus awgii ama tallaabooyink agaga jawaabay Coronavirus awgood?

fad ma u ducaysatay (Si ka baxsan sidii aad samayn shayd bisha Ramadaan)	15
fa isku dayday in aad abaabusho dadkaaga ama ooxda bulsho ee aad ka tirsantahay si ay isu aawiyaan am acid kale u caawiyaan?	13
fa isku dayday in aad caawimo dheeraad ah u hesho ladkaaga ama kooxda bulsho ee aad ka tirsan tahay?	10

QEEXDA TALLAABOOYINKA XADDIDAN EE AY DHINACYADA KALE QAADEEN SI LOOGA HORTAGO CAABUQA

Tusaha 15: Qeexda Tallaabooyinka Xaddidan Ee Ay Dhinacyada Kale Qaadeen Si Looga Hortago Caabuqa – Muqdisho

Maxaad ugu malaynaysa in dadka kale aanay wax badan ka qaban sidii ay nafahooda ama dadka kale uga ilaalil lahaayeen COVID-19?

Sababta ugu weyni waa aqoon la'aan	Laba sababood oo isku jira oo ah aqoon la'aan iyo dariiq kale oo aan u furnayn awgood. (Tusaale ahaan, Lacag la'aan, Fursad la'aan, ama dadka kale oo aad si dhow ula shaqayso awgeed)	Jid kale oo aan furnayn awgeed (Tusaale ahaan, Lacag la'aan, Fursad la'aan, ama dadka kale oo ay ahayd in aan si dhow ula shaqeyyo awgeed)	Ma ogi / Ka ma jawaabin
4	10	6	0

Tusaha 16: Qeexda Tallaabooyinka Xaddidan Ee Ay Dhinacyada Kale Qaadeen Si Looga Hortago Caabuqa – Hargeysa

Maxaad ugu malaynaysa in dadka kale aanay wax badan ka qaban sidii ay nafahooda ama dadka kale uga ilaalil lahaayeen COVID-19?

Sababta ugu weyni waa aqoon la'aan	Laba sababood oo isku jira oo ah aqoon la'aan iyo dariiq kale oo aan u furnayn awgood. (Tusaale ahaan, Lacag la'aan, Fursad la'aan, ama dadka kale oo aad si dhow ula shaqayso awgeed)	Jid kale oo aan furnayn awgeed (Tusaale ahaan, Lacag la'aan, Fursad la'aan, ama dadka kale oo ay ahayd in aan si dhow ula shaqeyyo awgeed)	Ma ogi / Ka ma jawaabin
1	18	1	0

DAREEN CELINTA NATIIJOOYINKA HORDHACA AH

Tusaha 17: Dareen-celinta ka qaybgalayaasha ee natiijooyinka hordhaca ah - Muqdisho

Ma waafaqsan tahay ama diiddan tahay hadallada soo socda?

	Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
Si fiican baad u fahansantay khatarta caafimaad ee ka dhalanaysa COVID-19	17	3	0	0	0	0
Hawlo badan ayaad u baahantayah si aad u xakamayo Fayraska, laakiin hawshaasi waxa ay u baahantay in la barbar wado caawimo maaliyadeed (Sida lacag la xawilo, qiiimaha oo la xakameeyo, cashurta oo la dhimo)	14	5	1	0	0	0
Waad taageersantahay xayiraadaha hadda lagu soo rogay tegista masaajidadda, iyo in guriga lagu tukado. Wuxa kale oo aad taageeri lahayd in xayiraado intaas ka badan la soo rogo, haddii si ku habboon la isugu afgarto.	11	5	1	3	0	0
Dadka dakhligoodu yar yahay ama aad u sii yar yahay waxa ay qabaan cabsi badan iyo caawimo la'aan.	18	2	0	0	0	0
Dadku waxa ay u baahan yihii in laga caawiyo sidii ay isaga ilaalin lahaayeen dhengalka dadka badan	12	7	0	0	0	1
Dadku inta badan aragtii togan ayaa ay ka qabaan la macaamilka kooxaha kale ee bulsho	4	6	2	5	3	0
Dadku waxa ay u baahan yihii in bilaysku uu noqdo mid taageeraya oo ilaalinaya, balse aanu noqon mid cadaadinaya	20	0	0	0	0	0

Tusaha 18: Dareen-celinta ka qaybgalayaasha ee natijjooyinka hordhaca ah - Hargeysa

Ma waafaqsan tahay ama diiddan tahay hadallada soo socda?

	Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
Si fican baad u fahansantay khatarta caafimaad ee ka dhalanaysa COVID-19	16	3	0	1	0	0
Hawlo badan ayaad u baahantahay si aad u xakamayo Fayraska, laakiin hawshaasi waxa ay u baahantay in la barbar wado caawimo maaLiyaadeed (Sida lacag la xawilo, qimaha oo la xakameeyo, cashuurta oo la dhimo)	16	4	0	0	0	0
Waad taageersantahay xayiraadaha hadda lagu soo rogay tegista masaaJiddada, iyo in guriga lagu tukado. Waxa kale oo aad taageeri lahayd in xayiraado intas ka badan la soo rogo, haddii si ku habboon la isugu afgarto.	18	2	0	0	0	0
Dadka dakhligoodu yar yahay ama aad u sii yar yahay waxa ay qabaan cabsi badan iyo caawimo la'aan.	1	4	1	2	0	0
Dadku waxa ay u baahan yihii in laga caawiyo sidii ay isaga ilaalilahaayeen dhxgalka dadka badan	12	7	0	0	0	1
Dadku inta badan aragtii togan ayaa ay ka qabaan la macaamilka kooxaha kale ee bulsho	6	4	1	7	3	0
Dadku waxa ay u baahan yihii in bilaysku uu noqdo mid taageeraya oo ilaalina, balse aanu noqon mid cadaadinaya	9	8	1	2	0	0

DIB U EEGISTA GACAN KA HADALKII LAGA CABSI QABAY

Tusaha 19: Cabsida laga qabo gacan ka hadalka – Muqdisho

Marka aad ka fikirto saddexda bilood ee soo socda, fadlan waxa aad noo sheegtaa illaa xadka aad adiga iyo qoyskaagu ka warwarsantihiin qabtaan in gacan ka hadal aad la kulantaan? (Cidda doontaa ha idin kula kacdo, tusaale ahaan Bilayska, dembiileyaal, qabiil, xubnaha qoyska, argagaxiso)

Aad u welwesan	Yara welwesan	Aan welwesanayn	Ma ogi / Ka ma jawaabin
4	7	7	2

Tusaha 20: Cabsida laga qabo gacan ka hadalka – Hargeysa

Marka aad ka fikirto saddexda bilood ee soo socda, fadlan waxa aad noo sheegtaa illaa xadka aad adiga iyo qoyskaagu ka warwarsantihiin qabtaan in gacan ka hadal aad la kulantaan? (Cidda doontaa ha idin kula kacdo, tusaale ahaan Bilayska, dembiileyaal, qabiil, xubnaha qoyska, argagaxiso)

Aad u welwesan	Yara welwesan	Aan welwesanayn	Ma ogi / Ka ma jawaabin
4	7	9	0

CEEBAYSIGA BUKAANKA IYO CABSIDA CORONAVIRUS

Tusaha 21: COVID-19 iyo xishoodka – Muqdisho

Ma jirto sabab ay u xishoodaan dadka qaba COVID-19?

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
17	2	0	1	0	0

Tusaha 22: COVID-19 iyo xishoodka – Hargeysa

Ma jirto sabab ay u xishoodaan dadka qaba COVID-19?

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
9	7	0	0	3	1

Tusaha 23: COVID-19 iyo Qarsiga xanuunka – Muqdisho

Haddii uu igu dhaco COVID-19 waxa aan isku dayi doonaa in aan dadka kale ka qariyo (Tusaale ahaan dadka aan qoyskayga ahayn)

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
2	5	1	3	9	0

Tusaha 24: COVID-19 iyo Qarsiga xanuunka – Hargeysa

Haddii uu igu dhaco COVID-19 waxa aan isku dayi doonaa in aan dadka kale ka qariyo (Tusaale ahaan dadka aan qoyskayga ahayn)

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
0	2	0	7	11	0

Tusaha 25: Maskaarada iyo colaadaysiga – Muqdisho

Colaad baan u qaadaa dadka xidha Maskaarada (Afka iyo sinka daboola)

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
0	4	1	7	8	0

Tusaha 26: Maskaarada iyo colaadaysiga – Hargeysa

Colaad baan u qaadaa dadka xidha Maskaarada (Afka iyo sinka daboola)

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
0	2	0	8	10	0

KA DHEGA-ADAYGISTA TEGISTA CISBITAALKA IYADA OO AY JIRAA CALAAMADIHII COVID-19

Tusaha 27: ka dhego-adaygista tegista cisbitaalka iyada oo ay jiraan calaamadihii covid-19 – Muqdisho

Haddii aan dareemo caafimaad darro la xidhiidha calaamadaha COVID-19 (Sida xummad ama qufac cusub oo xidhiidh ah) diyaar uma ihi in aan tago cisbitaal.

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
5	3	1	3	8	0

Tusaha 28: ka dhego-adaygista tegista cisbitaalka iyada oo ay jiraan calaamadihii covid-19 – Hargeysa

Haddii aan dareemo caafimaad darro la xidhiidha calaamadaha COVID-19 (Sida xummad ama qufac cusub oo xidhiidh ah) diyaar uma ihi in aan tago cisbitaal.

Aad baan u waafaqsanahay	Waan waafaqsanahay	Ma waafaqsani mana diiddani	Waan diiddanahay	Aad baan u diiddanahay	Ma ogi / Ka ma jawaabin
2	4	0	4	10	0

QIIMAYNTA

Tusaha 29: Qiimaynta mashruuca – Muqdisho

Maxaad ku qiimayn lahayd mashruucan guud ahaantii?

Heersare	Fiican	Ma fiicna, mana liito	Liita	Aad u liita
18	2	0	0	0

Tusaha 30: Qiimaynta mashruuca – Hargeysa

Maxaad ku qiimayn lahayd mashruucan guud ahaantii?

Heersare	Fiican	Ma fiicna, mana liito	Liita	Aad u liita
18	2	0	0	0

GORFEYN

Walaaca iyo baahida weyn ee wejiyada badan leh ee ka dhex jira dadka, gaar ahaan kuwa dakhligoodu hooseeyo

Dadka Muqdisho iyo Hargeysa waxa ay si aad ah uga warwarsan yihiin, cabsi weyn oo dhinacyo kala duwan ah oo ay ka qabaan waxa ku dhici kara saddexda bilood ee soo socda, gaar ahaan dadka dakhligoodu hooseeyo.

COVID-19 ayaa dadka maskaxdooda ku jira, laakiin waxa aan isaguna ka maqnayn werwer ka ay ka qabaan in dakhligooda ay ku waayaan tallaabooyinka lagu xakamaynayo COVID-19 awgood.

Dadka ka qaybgalay baadhistan in yar oo ka mid ah ayaa sheegay in xaaladdooda dhaqaale ay u saamaxaysay in ay qaadaan tallaa-

booyinka looga baahan yahay, sida kaydsashada cuntada, iska bixinta deymaha, lacag dhigasho ama in ay soo amaahdaan lacag ama badeecadaha kale ee ay u baahan yihiin, in ay shaqo dheeraad ah oo kale qabtaan ama in ay caawimo lacageed oo dheeraad ah cid kale siiyaan.

Iyada oo dalal badan oo adduunka ahi ay qadeen tallaabooyin ay dadka ugu dabcinayaan duruufaha ka dhashay Coronaviruskuwaas oo ay ka mid yihiin qorsheyaal fasaxyo shaqo ah iyo nidaamyo caawimo bulsho ah, Soomaalida kama dhex jirto arrintaasi. Tiro aad u yar oo ka mid ah dadka ka qaybgalay baadhistan ayaa sheegay in laga diiwaangeliyey barnaamijyo caawimo lacageed loogu soo xawilayo taleefankooda gacanta. Fursado ay dadku ku heli karaan maaliyad oo aan jirin ayaa ah calaamad muujinaysa khatarta jirta. Waxaas oo

dhan waxaa ka sii daran, dakhli la'aan dadka soo waajahday iyada oo qiimihii suuquna kor u kacay. Arrimahaas oo dhami waxa ay ifitiiminayaan walaaca baahsan ee dadku, gaar ahaan ka qaybgalayaasha uu dakhligoodu hooseeyaa ka qabaan baahiyihii aasaasiga ahaa oo aanay helayn, gaar ahaan raashinka, biyaha nadiifta ah iyo hoyga. Dadka qaarkood helitaanka cuntada iyo biyaha nadiifta ahi waa ay ka sii adkaatay xitaa sidii ay markii hore ahaan jirtay. Dad badanna, ma helaan wax daryeel caafimaad ah, deyn badan ayaana ku ururtay.

Waxa aanu aragnay caddaymo waaweyn oo muujinaya in marka laga tago COVID-19, ay sida oo kale ka qaybgalayaasha, gaar ahaan kuwa dakhligoodu hooseeyo, werwer weyn ka qabaan arrimaha caafimaadkooda jidheed la xidhiidha, oo ay ka mid tahay in lagu takooro kooxda bulsho ee ay ka tirsan yihiin awgeed ama gacan ka hadal kaga yimaadda dembi faleyaasha, in uu kordho gacan ka hadalka ku salaysan jinsiga iyo gudniinka fir-cooniga ah ee habluhu.

Iyada oo ay Soomaalidu tahay bulsho waxoogaa la xishoota bukaanka dhimirka, ayaa xaqqiqaada baadhistan ka soo baxday ay tahay in saddex meelood meel ka mid ah ka qaybgalayaashu ay qireen in ay waxoogaa ka war-warsan yihiin caafimaadka dhimirkooda ama caafimaadka cid ka mid ah xubnaha qoyskooda. Ka qaybgalayaasha kuwooda ugu fursadaha badan iyo kuwa ugu fursadaha yarba waxa ay qabeen aragtiyo isku mid ah, laakiin kuwa fursadaha yar waxaa u dheeraa cabsida ay qabaan oo halkii ugu sarraysay gaadhey, dakhligooda lumaya ama arrimo gaar ah oo ay waayayaan awgood. (Waxaa ka mid ah Barkaacyaasha oo aan hayasan metealaad iyo la qabsi joogto ah, haweenka oo la kulmaya gacanka hadal iyo xad gudubyo jinsigu sabab u yahay, ganacsatada yaryar ee aan rasmiga ahayn oo bilayska musuqmaasuqa ku kacaa ay baadaan.

Wax la aqballi karo ma'aha in tallaabooyinka loo qaadayo

ilaalinta caafimaadka dadweynuhu ay noqdaan kuwo burburinaya nolosha, iyada oo aan dadka la siinayn taageero dhaqaale, gaar ahaan marka ay yihiin tallaabooyin aan waxtar yeelanayn

Marar badan ayaa aynu maqalnay in tallaabooyinka la doonayo in lagu xakameeyo COVID-19 ay qoysaska qaar u horseedeen dhibaatooyin. Dakhligii dadku heli jireen oo mee-sha ka baxa iyada oo aan wax caawimo ah la siinayni waxa ay ka dhigantahay in dadku ay gaajo waajiji doonaan iyo in ay la kulmi doonaan dhibaato maaliyadeed oo aad u weyn. Haddii dawlad waxa laga rabay uu yahay in ay u adeegto dadweynaha, waxaa hubaal ah in tallaabooyinkan miisaankoodu uu fashilinayo dadka aad u nugul. Nidaam dakhli ama deeq haddii aan la helin dadku waa ay macaluuli doonaan. Maciishaddii quruxda badnayd ee ay dadku samaysteen si ay nafahooda ugu noolaadaanna meesha ayaa ay ka bixi doontaa, iyada oo aan weliba wax kalsooni ah lagu qabin in hab nololeedkaas ka burbura dib loo dhisi karo iyo iyada oo uu imikadanba silic badani jiro.

Dugsiyadii waa la xidhay xayiraado badan oo kalana waxaa lagu soo rogay hababkii ay dadku noloshooda kula soo baxayeen, (Waxaa ka mid ah kuwo aan macno yeelanayn, sida bandooga Muqdisho) iyada oo haddana weli la ogolyahay in dadku ay isugu yimaaddaan kulanno kale oo bulsho. Dhibaatooyinka maaliyadeed ee jira qaarkood waxaa sababa shakh-siyaad iyo qoysas doonaya in ay nafahooda ilaashadaan. (Tusaale ahaan waxa ay joojinayaan shaqaalihii nadaafadda ee gurayaha uga shaqaynayey iyo tegitaankii maqaaxiyya-ha) halkii ay ka ahayd in ay dhaqangeliyan siyaasadda dawladda. Guud ahaan, waxaa muhiim ah in awoodda la soo bixista maciishada lagu badbaadayaa ay mudnaanta koowaad yeelato. Siyaasadaha dalwaddu waa in ay noqdaan kuwo ilaalinaya nolol maalmeedka

isla markaana xoojinaya caafimaadka (Tusaale ahaan, in la dhaqangeliyo kala fogaanshiyaha bulsho, gacmo dhiqista, in wejiga la daboolo iyo wixii la midka ah).

Tallaabooyin xaddidan oo lagaga hortegayo caabuqa COVID-19: Kuwaas oo sababtooda ugu weyni la xidhiidho nidaamka maamul iyo bulshada, balse aanay sababtu ahayn xog la'aan

Inta badan, dhammaan dadkii ka qaygalay cilmibaadhistani waxa ay muujiyeen sida ay u fahamsan yihiin hababka aasaasiga ah ee looga hortago COVID-19. Faquuqo dadka qaar lagu samaynayaa guud ahaan, ma'ay noqon sabab dadka ka horistaagta in ay helaan barashada xogta la xidhiidha waxtarka faraxalka iyo kala fogaanshiyaha bulsho. Halka marka la eego aqoonta dadku u leeyihiin COVID-19 laga arkayo qabyo iyo marmarka qaarkood qaladaad, haddana waxa aynu qiraynaa in aanay arrintaasi noqon sabab indhaha ka jeedisa caqabadaha bulsho ee kale ee inta badan jira, (Oo ay ka mid tahay tegista gobaha shaqo ee dadka badani isugu yimaaddaan, biyo la'aanta iyo lacag la'aanta hortaaagan in qofku uu gaar gurigiisa ugu negaado) iyo caqabadaha bulsho (Tusaale ahaan in la dareemo baahida loo qabo in la fuliyo hababka xidhiidhka iyo is dhexgalka bulsho ee lagu kalsoonyahay) Si looga hortago caabuqa. In dhugmo loo yeelan waayo sababaha nidaamka maamul ama bulsho ee jiraa, waxa ay keeni kartaa in canaanta oo dhan dusha laga saaro shakhsiyadka ama in si dulmi ah dadweynaha loogu canaanto in aanay qaadanayn ama ku dhaqmayn farriimaha caafimaad ee la siinayo.

Marka laga hadlayo weji daboolista, sababaha dadka ka hortaagan in ay si joogto ah u isticmaalaan waxa ay ku ururaysaa saddex sababood. Qiiimaha lagu iibinayo maskaarada (Weji daboolka) oo aan la jibin si loo xakameeyo faafista xanuunka, war ma'ognimada oo

teed noqota (Faham qaldan oo laga qaato xanuunka), caqabado nidaamka maamul ka yimaadda (Sida In aanay jirin weji dabool / Maskaa rooyin lacag la'aan lagu qaybinayo) iyo teedad bulsho, sida dadka oo ka baqaya in lagu ceebsado. Xidhashada maskaarada Gunaanadkii qodobbadan, ka qaybgalayaashu waxa ay ka warrameen baahida loo qabo in la yareeyo cabsida iyo faham darrada – Dadka colaadda kala hortagaya dadka wejiga daboola, waxa ay ku andacoonaayaan in daboolista wejigu ay calaamat u tahay in qofku uu qabo caabuqii, sidaas awgeed uu khatar ku yahay naftooda maadaama oo uu qaadsiin karo. Weji daboolidda waa in loo arkaa in ay tahay calaamat caddaynaysa in qofkani uu daryeelayo dadka kale, oo uu diidan yahay in uu u gudbiyo haddii uu dhib qabo; iyo in dadka wejiga dabooshaa aanay u fahmin in ay caabuqii qabaan, balse ay inta badan isku dayayaan uun in ay dadka kale caafimaadkooda ilaaliyaan haddiiba uu caabaqu iyaga ku dhaco, sida oo kalana weji daboolistu iyaga qudhoodana ay u tahay ilaalin.

Ka qaybgalayaal badan ayaa sheegay aaminsanaantooda iyo walaaca ay ka qabaan in aanay dadka kale aqoon u lahayn siyaabaha looga hortegi karo faafitaanka xanuunka ama hababka ay tahay in xogtaas loogu dhaqmo ama labadaas arrimood oo la isku daray. Ka qaybgalayaashu marka ay sharraxayaan sababaha keenay in ay si xaddidan ugu dhaqmaan tallaabooyinka xakamaynta xanuunka, waxa aynu inta badan ka maqlaynaa in ay yihiin tallaabooyin aan waaqaca la jaanqaadayn. Tusaale ahaan, in aanay haysan lacag ay ku iibsadaan saabuun ama dareeraha jeermis dilaha ah, in aanay biyo helin, ama in aanay iska ilaalin Karin ku noolaanshiyaha iyo ka dhex shaqaynta meelaha dadka badani isugu yimaaddaan. Waxaa taas dheer, ogaanshiyaha ay ogaadeen waxa ay tahay in ay sameeyaan oo lagu daray in aanay haysan imkaaniyaadkii u suurtagelin lahaa arrintaas fulinteeda oo ku abuurtay dareen ah tamar la'aan. Ka qaybgalayaashu waxa ay doorbideen in ay waxbarasho dheeraad ah helaan, in kor loo qaado heerka wacyigelineed iyo in laga taakuleeyo

sidii ay u qaban lahaayeen wax badan oo ay nafahooda iyo dadka kalaba ku ilaalinayaan.

Siyaasadaha caafimaadka dadweynaha iyo waxbarashadu waa in ay xoogga saaraan sidii ay u caawin lahaayeen waxa ay tahay in ay dadku sameeyaan, iyaga oo hubinaya in uu waxaasi yahay wax ay dadku awoodi karaan fulintiisa, iyo in ay yihiin wax la hubiyey in bulsho ahaan ay yihiin wax la ogolyahay marka ay sameeyaan.

Baahida degdeffa ah ee loo qabo in la dhiso kalsoonida iyo in la badbaadiyo caafimaadka guud ee dadweynaha

Daryeelka caafimaadku inta badan waa mid aan jirin ama aan la awoodi Karin, meelaha uu ka jirana inta badan kalsooni laguma qabo. Dadku waxa ay ka cabsi qabaan in lagu qasbo Karantiin, waxa ay ka cabsi qabaan in ay awoodi kari waayaan in ay maciishaddooda shaqaystaan haddii ay qirtaan in ay qabaan Coronavirus, cabsida ay ka qabaan in la deyriyo xitaa marka ay ka bogsadaan kaddib, sababo la ixdhiidha beenta laga aaminsanyahay ee ah in ay weli xanuunkii qabaan iyo cabsida ay ka qabaan in mustaqbalka fog lagu ceeksado xanuunka. Wax ka qabashada arrimahaas aynu soo xusnay waa in ay noqotaa xuddunta jawaabta aynu ka bixinayno xanuunka COVID-19.

Jawaab wax-ku-ool ah oo laga bixiyo COVID-19 waxa ay ku soo ururaysaa in la abuuro kalsoonida iyo iskaashiga bulshada. Taasina waxa ay u baahantahay:

- In la abuuro xarumo daryeelka caafimaadka bulshada ah oo nidaam iyo ilo maaliyadeed oo ku habboon leh, shaqaale xirfadlayaal ahi joogaan, dadkana bilaash ugu adeega.
- In kormeerro iyo booqasho lagu ogaanayo kuwa calaamadaha xanuunkan leh lagu sameeyo caafimaadka bulshada si kor loogu qaado daryeelkooda, goor horena la bilaabo xakamaynta dilaacista xanuunka.
- In la kordhiyo baadhista caabuqa COVID-19.
- In ilo dhaqaale loo helo taakulaynta dadka si iskood ah isu karantiima ama gaar guryahooda ugu ekaada. (Sida cunto la gaadhsiiyo, iyo in lacago loogu diro taleefankooda gacanta, si ay aanay bannaanka ugu soo bixin)
- In daryeel cisbitaal oo lacag la'aan ah la siyo dadka leh calaamadaha Coronavirus, ka hor inta aanay aad u xanuunsan (In goor hore daryeel caafimaad la siyyaa waxa ay caawinaysaa in ay korodho rajada ah in ay badbaadaan) iyo in laga ilaaliyo in ay xanuunka dadka kale qaadsiyyaan.
- In la xaqijijo in dadka cisbitaallada la dhigaa ay helaan cuntada ay u baahan yihiin, in ay cibaadaysan karaan, iyo in qoysaskoodu caawin karaan.
- In la abuuro shabakad internet ka ah 'Website' xarun dadka laga Waco, iyo barnaamij taleefanka gacanta ku shaqeeya oo ay dadku ka soo sheegaan calaamadaha ay isku arkaan, lagana dhiirrigeliyo iyaga oo og in ay helayaan daryeel iyo caawimo tayo sare leh oo lacag la'aan ah.
- In dadka xanuunka ka bogsaday ee helay daryeel fiican iyo caawimo loo adeegsado in ay bulshada la wadaagaan dareen-celintooda arrintan la xidhiidha.
- In dadka la gaadhsiiyo farriinta ah in qofka xanuunka COVID-19 ka bogsada, 14 maalmood kaddib in aanu xanuunkan qabin. Qaabka dadka arrintan loo gaadhsiinayo waa in ay ka mid tahay in shirkadaha isgaadhsiinta laga codsado in farriimo arrintaas sheegaya ay geliyaan codadka soo dhicista taleefanka, sida oo kalana tababarro la siiyo hawl Wadeennada xarumaha wicista dadka iyo codad lagu duubo taleefannada gacanta.
- In laga hortago fadeexadaynta iyo ceebta muddada dheer lagu suntayo qofka xanuunku ku dhaco.
- In la kordhiyo helitaanka bilaashka ah ee saabuunta, biyaha iyo goobaha gacmaha lagu dhaqo.

- In dib u habayn bulsho la sameeyo iyo in la sameeyo boodhad wacyigelin ah si kala fogaanshiyaha bulshada loo fududeeyo.
- In la xoojiyo sidii weji xidhka ama isticmaalka maskaaradu u noqon lahayd caado bulshada ku dhix faafaa, iyada oo la bixinayo maskaarooyin lacag la'aan ah, iyo aqoon ku aaddaan isla markaana la dhiirrigelinayo in bulshadu ay arrin cadiya u aragto isticmaalkooda.

Waxyabahaas aynu xusnay midkoodna ma'aha daryeel caafimaad oo qiimihisu qaliiyahay ama teknoolajiyad u baahan. Waa arrimo la samayn karo xitaa cidhiidhiga caqabadda ku noqda kala fogaanshiyaha bulshada iyo lacag la'aantu ay ka dhibaato badan yihiin xanuunka laftigisa.

Ilaха dhaqaale oo yar awgeed, waxaa laga maarmaan noqonaya in fulinta arrintan lagu bilaabo tiro yar oo tijaabo ah oo laga sameeyo xarumo caafimaad oo heer degmo ah iyo barnamijyo ka jawaabista COVID-19 ah, kaddibna loo fidiyo hadba sida ilo dhaqaale loogu helo. Guul laga gaadho hawlahani waxa kale oo ay gun dhig abuuraysaa sidii ay bulshadu ugu lug yeelan lahayd horumarka joogtaysan.

Is-afgarad xeeldheer oo bal-laan in laga yeesho dham-maan arrimaha muhiimka ah

Arrintan marka laga hadlayo, Muqdisho iyo Hargeysa inta ay iskaga midka yihiin ayaa ka badan waxyabaha ay ku kala duwan yihiin.

Inta bada, arrimahan oo dhan waa iskaga mid Muqdisho iyo Hargeysa. Inta badan kala duwanaanshiyuhu waxa uu ahaa mid aad u yar. Dadka qurbajoogta ah ayaa kaalin muhiim ah kaga qaata lacagaha ay u soo dirayaan dadka qaarabada ah.

Shirkadaha isgaadhisiinta ayaa iyaguna codadka soo dhicista taleefanka ku caawiyey faafinta aqoonta la xidhiidha COVID-19. Laakiintaas waxaa barbar socda sicirbararka ay ganacsatade kale samaynayaan oo dadka raad

taban ku yeeshay. Saaxiibbada, qaraabada, qoysaska dalka gudihiisa deggen, dawladaha shisheeye, hay'adaha maxalliga ah iyo ururada iyo hay'adaha caalamiga ah dhammaantood gacan waa ay ka geysanayaan, laakiin waa ay yartahay. Inkasta oo Hargeysa aanu wax fal argagaxiso ahi ka dhicin tan iyo sanadkii 2008, halka Muqdisho ay weli tahay goob ay khatartaasi ka jirto, haddana war-war isku mid ah ayaa laga qabaa in gacan ka hadal lagula kaco dadka xanuunkan qaba. Wuxuu ay u muuqataa in sababta arrintani ay tahay la qabsiga gacan ka hadalka iyo dembiyada dhaca ee ka jira labada dhinacba, ee inkasta oo ay heerarkiisu kala duwan yihiin, ay sababtoodu tahay ilaha dakhli oo yar, shaqo la'aanta oo sii kordhaysa iyo rag badan oo helaya firaaqo intii hore ka badan. Wuxuu keliya ee ay ku kala duwan yihiin labada magaalo waa fahamka badan ee togan ee dawladaha hoose iyo dhaxe ee Muqdisho u leeyihiin arrintan marka la barbar dhigo Hargeysa. Waxaa laga yaabaa in arrintan sababteedu ay tahay isu dheellitirnaan la'aanta dhinca ilaha dhaqaale ee jira ama kala duwanaanta isticmaalka dakhligas.

Muhiimadda Islaamku siiyey nolosha wanaagsan, quwadda, takoor la'aanta iyo is caawinta

Ka qaybgalayaashu waxa ay marar badan soo qaadeen diinta Islaamka oo ay ku xidhiidhiyeen rejo, raaxo, awood, wax bixin, deeqsinimo iyo bulsho. Markii aanu ka qaybgalayaasha weydiinay in ay taageersan yihiin xayiraadaha la saaray tegista masaajiddada iyo amarrada lagu bixiyey in guryaha lagu tukado, iyo in ay taageersan yihiin in xayiraado dheeraad ah lagu soo rogo haddii la isku afgarto, guud ahaan taageero xooggan ayaa ay u muujiyeen. Arrintan iyo taageerada yar ee loo muujiyey masaajiddada marka laga hadlayo raadka ay xaaladdan ku yeelanyaan, waxa ay ina tusaysaa in aanay ahayn in diinta Islaamka xayndaab aasaasi ah looga dhigo ka jawaabista COVID-19. Balse la ogaado in ay la jaanqaadi karto isla markaana caawin karto. Arrintani waxa ay burinaysaa

fikraddii ahayd ku adkaanta diinta Islaamka ee aragtida qofka Soomaaliga ahi in ay caqabadda ku noqonayso ka hortagga faafitaanka COVID-19. Natijjooyinka aanu helnay waxa ay muujinayaan in aanay qasab ahayn in jawaabta laga bixinayo COVID-19 marka koowaad la sii mariyo masaajidda, laakiin in taageeraada masaajiddu ay muhiim u tahay sharcinimada iyo ku dhaqanka tallaaboooyinkaas.

***Waxaa loo baahan yahay in heshiis
Ballaadhan oo qoto dheer laga yeesho
tallaaboooyinka ah tahay in degdeg loo
qaado***

Waxaa xusid mudan ballaadhnida iyo qotadheeraanta heshiisyada laga gaadhay arrimaha muhiimka ah. Ka qaybgalayaashu waxa ay si aad ah isugu waafaqeen fahamkooda ahaa in khatarta ka imanaysa COVID-19 ay u baahantahay tallaabooyn dheeraad ah, oo lagu taageero caawimo dhaqaale oo dheeraad ah iyo in taageero badan laga geysto sidii looga hortegi lahaa isu imaanishiyaha dadka, in la taageero xayiraadaha la saaray tegitaanka masaajidda, in bilayska laga rabo in ay gacan ka geystaan, iyo in dadka faqiirka ahi ay dareemaan cabsi iyo rejo la'aan. Is afgaradka noocan ah ee dhowi waxa uu siyaasadda u noqon karaa gun dhig caafimaad qaba. In la sameeyo soo jeedimo ku aaddan ka hortagga iyo siyaabaha ay tahay in la isaga ilaaliyo loona xoojiyo nolosha, maciishadda iyo in aan dad gaar ah la faquuqin, ka qaybgalayaashu waxa ay carrabka ku adkeeyeen muhiimadda ay leedahay in la helo maalgelin waqtiga fog lagu sameeyo nidaamka iyo kaabayaasha iyo sida oo kale in waqtiga dhow la helo tallaaboooyinka xaaladaha degdegga ah oo ah kuwo diiradda saaraya meelo gaar ah. Arrintani waa mid ku habboon guud ahaan caafimaadka guud ee COVID-19, baahiyaha aasaasiga ah, u dhammaanshiyaha bulshada, gacan ka hadalka iyo hababka kale. Waxaa jira isku waafaqsanaan guud oo ku aaddan baahida loo qabo in bilaysku uu qaato door kaalmayn ah, balse aan ahayn cadaadis. Waxaa si isku mid ah oo xooggan, sababo maangal ahna leh loo diiddanaa bandooga habeenkii lagu

soo rogay Muqdisho, kaas oo loo arkayey mid aan waxba ka tarayn ka hortagga faafitaanka COVID-19. Diidmadaas sababta caqligalka ah leh ee ay dadku kala hor yimaaddeen bandooga iyo baahida qasbaysa in ay maciishaddooda raadsadaan, waxa ay dadka reer Muqdisho ku kalliftay in ay helaan habab ay ku bixi karaan xitaa iyada oo uu bandoow jiro. Ka qaybgalayaashu waxa tilmaameen waxa ay ku sheegeen baahida loo qabo in la helo daryeel caafimaad oo aan ahayn kaas la xidhiidha COVID-19 – sida in la helo nidaam daryeel caafimaad oo habboon bilaa lacagna lagu heli karo, iyo in xal loo helo sinnaan la'aanta bulsho ee sababta caafimaad darrada.

***In heshiis qotadheer oo aasaasi ah
laga yeesho aasaasiyaadka waxa loo-
ga jeedo dib u dhiska wanaagsan ee
loo baahan yahay***

Waxaa dhammaan la isku waafaqsanaa aasaasiyaadka sida ay tahay in si fiican loogu sameeyo dib u dhiska, nolosha, maciishadda, u dhammaanshiyaha bulshada, qaab nooleedka, si waxtar u leh jiilalka hadda iyo mustaqbalkaba, loona ogolaanayo in dunida dabiiciga ahi ay badhaadho. Qodobbo isku mid ah ayaa marar badan lagu celceliyey, qodobbada hal ama laba qof sheegeenna waxa ay ahaayeen kuwo aan ka hor imanayn qodobbada aad la isugu waafaqay. Waxaa la filayey in lagu kala aragti duwanaado siyaasadaha meelaha qaar looga baahan yahay, kala mudnaysiinta arrimaha iyo qaybinta khayraadka. Si kastaba ha ahaato ee, ka qaybgalayaashu waxa ay si guud u door bideen in ay xooggooda isugu geeyaan arrimaha ay isku waafaqsan yihiin, marka la eego arrimaha ay ku kala aragtida duwan yihiin.

***Go'aamada iyo mawaaqifta togan
ee la wadaagayey oo gun dhig u no-
qonayey hawl waxtar leh in la qabto***

Iyada oo ay jiraan dhibaatoyinka ka dhashay COVID-19 iyo ka jawaabistiisa in ay sii xumeeyeen dhibaatooyinkii horeba u jiray, ka qaybgalayaashu waxa ay soo gudbiyeen farriin xoog badan oo la xidhiidha sharaftooda, fahamkoo-

da, maangalnimada dooddooda, naxariistooda iyo in ay diyaar u yihiin in aan bulshada la kala reebin.

Waxa ay tilmaameen doonistooda ah in ay helaan daryeel caafimaad oo la gaadhi karo, iyaga oo laakiin aan rajo badan ka qabin in loo fuliyo doonistoodaa. Ma jiraan caddaymo muujinaya in cabsida weyn ee hadda jirtaa ay ku hoggaamisay nacayb ama ceebaysi iyo takoor loo qaado qofka xanuunka qaba. Runtii waxa ay ku celceliyeen hadalladooda ka dhanka ah arrimahaas, iyaga oo warwar ka qaba jiritaanka ay arrimahaasi jiraan isla mar-kaana ku dardaarmay in la ilaaliyo midnima- da, bani'aadannimada guud iyo iskaashiga. Markii aanu weydiinay su'alo aanu doonaynay in aanu ku ogaanno in ka qaybgalayaashu ay leeyihiiin dabeeecado deyrinaya dadka xanuunka qaba ama in ay horeba ugu lug yeeshen falal deyrin ah. ka qaybgalayaashu waxa ay caado ka dhigteen in ay su'aalahayaga dib u fasiraad ku sameeyaan, iyaga oo ka dhigaya kuwo togan marka loo eego kala fogaanshi- yaha bulsho iyo falal ka dhan ah takoorka dad- ka bukaanka qaba. Waxaa calool xumo leh in dad aan waxbarasho lahayn, dakhligooduna aad u hooseeyo oo ku nool mid ka mid ah dalalka ugu saboolsan adduunku, ay kaaga warramaan dadaalladooda ay isku gacan qabanyaan dhexdooda (Sida qoysas raashinka wadaagaya marka midkood aanu maalintaas raashin haysan) iyo sida ay uga xun yihiin in aanay intaas ka badan isku caawin Karin.

Qodobbada aanu halkan ku soo bandhignay ujeedadoodu ma'aha in aanu qurxinno ama buunbuunino wanaagga ka qaybgalayaasha ama guud ahaan Soomaalida; waxaa xaqiiqo ah in qaarkood ay ka warrameen falal deyrin

bukaan ah oo ay u soo joogeen ama iyaga lagula kacay. Arrintaasi in ay jirtana waxaaba laga dhex fahmayey jawaabaha ay ka bixinay- een su'aasha aanu ka weydiinay bal in dad- ku mar kasta habdhaqan togan ku qaabilan kooxaha bulsho ee ka duwan. Si kastaba ha ahaato ee waxaa jira, caddaymo xooggan oo muujinaya deyrin la'aantaas oo ay tahay in la aqoonsado lana xoojiyo.

Ka qaybgalayaashu aragti aad u togan ayaa ay ka haysteen mashruu- ca, waxa aanay rabeen in uu siii socdo lana fidiyo

Waxa aanu aad ugu faraxsanahay in dham- maan ka qaybgalayaashu ay mashruuca si togan u qiimeeyeen, iyada oo ugu yaraan dhammaantood ku qiimeeyey, 'Heersare'. Dhibcaha fiican ee ay ku qiimeeyeen mashruu- can, sababtoodu waxa ay ahayd in bulshadu u dhantahay, hababkiisa ah in midhaha ka soo baxayaa ay noqdaan kuwo iskaashi ku yimi, habka aanu uga hawlgalnay ee ahaa caawi- mo dareen qiro leh iyo xurmayn ku imanayey, nuxurka ku jiray qadiydaha la helay, qiimaha waxbarasho ee la xidhiidhay COVID-19 iyo dh- aqaalaha la siiyey ka qaybgalayaasha.

Arrin togan oo muhiim ah oo uu mashruu- cani lahaa waxa ay ahayd in qof kasta oo ka qaybgalayaasha dakhligoodu hooseeyo ka mid ahaa la siiyey kulan kasta lacag dhan 25 Doolar. Asal ahaanba waxaa dhibaato ah, xilli lagu jiro duruufo maaliyadeed oo xun in aad dadka weydiisato in ay waqtigooda iyo tamartooda bilaash kugu siyyaan, iyada oo qof kasta oo kale oo mashruuca ku lug leh la siinayo lacag, weliba aalaaba ka badan inta ka qaybgalayaashu ay abidkoodba niyadda geliyeen in ay shaqaysan karaan.

GUNAANAD

Muqdisho iyo Hargeysa ugu yaraan illaa hadda xanuunka COVID-19 uguma uu dillaacin sida ba'an ee uu uga dillaacay meelo kale oo adduunka ka mid ah. Si kastaba ha ahaato ee, dadka sida aadka ah loo takooro waxaa xaalad quus ah ku riday, hababka hadda looga jawaabay COVID-19 , iyada oo aanay jirin caawimo bulsho oo macno leh iyo gaar ahaan kaalmo dhaqaale. Xaaladda dadkaasi waa ay sii xumaanaysaa. Haddii COVID-19 uu sii batana xaaladdoodu waxa ay si dhaqso ah u noqon kartaa mid aad uga sii xun sida hadda.

Dadka, gaar ahaan kuwa dakhligoodu hooseeyo, arrimo badan ayaa dhibaato iyo warwar ku haya; waxaa ka mid ah dakhligooda oo luma, arrimo la xidhiidha caafimaadkooda jidheed oo aan ahayn COVID-19, cidda ay yihiin darteed oo loo takoro, gacan ka hadal iyo xadgudub lagula kaco, (iyada oo ay jiraan dembiyada, xadgudubyada jinsiga ku salaysan oo sii kordhaya iyo gudniinka fircooniya ah ee haweenka) iyo caafimaadkooda dhimirka.

Waa in aan la dhaqangelin bandoow dhammaystiran ama qayb ahaan ah, iyada oo aan la raacin kaalmo dhaqaale oo dadka la siinayo, gaar ahaan kuwa aadka saboolka u ah: Waxaa loo baahan yahay in diiradda si gaar ah loo saaro tallaabooyinka la sii wadi karo muddada dheer, sida gacmo dhiqista, kala fogaanishiya-ha dadka iyo daboolista wejiga.

Waa in dadka waxbarasho la xidhiidha caafimaadka dadweynaha laga siiyo waxa ay tahay in ay dhab ahaan sameeyaan si ay nafahooda u ilaaliyaan. Waxaa iyaduna muhiimad taas la mid ah leh, in la helo ilo dhaqaale oo suurtagal ka dhigaya tallaabooyinkaas, isla markaana waa in la xoojiyo tallaabooyinkaas iyada oo loo arkayo in ay leeyihii qime bulsho iyo masuuliyad la isku hallayn karo isla

markaana dabiici yihii.

Ka jawaabista COVID-19 iyo horumarka joogtaysan waxaa caqabad ku ah, xaqiiqada ah in daryeelka caafimaad uu inta badan yahay mid aan jirin, aan la awoodi Karin, ama aan lagu kalsoonaan Karin. Maamulladu waa in ay mudnaanta koowaad siiyan yagleelidda tas-hiilaad caafimaad oo ay bulshadu leedahay, kuwaas oo ah kuwo lagu kalsoonaan karo oo la nidaamiyo, badqaba, isla markaana lacag la'aan ah.

Marka tiro yar laga reebo, Muqdisho iyo Hargeysaba waxaa si ballaadhan oo xeeldheer la isugu waafaqsanaa arrimaha muhiimka ah oo dhan. Waxaa ka mid ahaa in la isku waafaqsanaa muhiimadda uu Islaamku siiyey nolol wanaagga, quwadda, in dadka aan la kala faquuqin, iyo in la is caawiyo; Tallaabooyinka loo baahan yahay in si dhaqso ah loo qaado; iyo asaasiyadka waxa looga jeedo dib u dhis wanaagsan.

Xitaa ilaha dhaqaale oo koobnaa, haddana wax badan ayaa la qaban karayey. Intii hawsha lagu jiray, waxa aanu helnay in ka qaybgalayaashu ay wadaagayeen aragtiyo badan oo la xidhiidha ilaha muhiimka u ah dhismaha shakhsiyadeed iyo tallaabooyinka ay tahay in wadajir loo qaado. Mar kasta oo ay suurtagal noqoto, waxaa waajib noqonaysa in hawsha la qabanayaa ay noqoto mid ay qayb ka yihiin, balse aan keliya loo qabanayn dadka aad loo takooray, waana in dadkaas lacag laga siisto waqtiga iyo tamarta ay bixinayaan, taas oo ah qiiimayn, xurmayn iyo u dhammaanshiyaha loo baahan yahay.

Waxaa la joogaa waqtigii hore loogu sii socn lahaa horumarka waara inta lagu jiro xanuunkan iyo iyada oo ah hab imika looga jawaabi karo COVID-19.

COVIDEV

Mashruuca COVIDEV waa cilmibaadhis iyo hawl iskaashi oo ay wada qabteen jaamacadda Bristol iyo Transparency Solutions oo la xidhiidha ilaalinta iyo xoojinta horumarka waara / joogtaysan ee Soomaaliya / Somaliland inta lagu guda jiro, iyada oo loo sii dhex marayo iyo iyada oo ah hab looga jawaabay COVID-19.

COVIDEV waxa uu qayb ka yahay hindisaha ay iska kaashadeen Jaamacadda Bristol iyo Transparency Solutions ee Soomaalida mud-naanta leh' oo lagu xoojinayo in horumarka dhinacyada oo dhan ah ee la hirgelinaya uu noqdo mid ay Soomaalidu hoggaaminayso. Transparency Solutions waxa ay jaal Istaraatijiya oo rasmi ah la tahay jaamacadda Bristol.



University of
BRISTOL



Transparency
Solutions